Tusmada Buugga

Tusmada Buugga 5

Hordhac 7

Loollan, Tilmaamaha taliyayaasha 14

Xisbullaah iyo hungada sheeko baralaydii gulufyada. 22

Cutubka 1aad: Dejinta Qorshayaasha 28

Cutubka 2aad: Dagaal-oogista 36

Cutubka 3aad: Xeelad-ku-Weerarka 41

Cutubka 4aad: Taatikada Xeeladaysan 46

Cutubka 5aad: Tamarta Iyo Karaanka 51

Cutubka 6aad: Qodobbada Tamarta Iyo Taagdarrida 57

Cutubka 7aad: Carbinta gulufka 66

Cutubka 8aad: Midabaynta taatikada dagaalka ... 73

Cutubka 9aad:Carbinta iyo dagaalgelinta colka .. 77

Cutubka10aad : Ka la sarraynta dhulka. 86

Cutubka 11aad: Sagaalka Goobood Ee Colaadda 94
Cutubka12aad: Dab ku-weerarka 109
Cutubka 13aad: Adeegsiga Sirdoonka 113
Gunaanad 119

Hordhac

Dhiganahan "Loollan/Xeeladaha dagaalka" waxa qoray maanmaal Shiine ahaa oo la odhan jiray Sun Tzu (Soon Tisuu). In kasta oo aan si hubanti ah loo garanayn waayaha uu dhashay iyo dhimashadiisii, haddana sida loo badinayo waxa uu noolaa intii u dhexaysay 551^{kii} MKH[1] - 496^{kii} MKH. Dhiganahan waxa lagu tiriyaa mid ka mid ah boqolka dhigane ee sooyaalka Aadamaha ugu mudan.

In kasta oo uu yahay buug waayo hore la allifay, haddana waa mid ka mid ah tiirarka ugu adadag ee istiraatiijiyadda ciidanka looga shidaal qaato waayeheenan.

Waxa uu Sun Tzu u dhashay, askarina uu u ahaa boqortooyadii Qi[2] ee Shiinaha[3] ka jirtay waagaas. Waxa uu ka dhashay qoys ciidannimada ku sheeggan oo aabbihii iyo awowgiiba waxa ay ahaayeen taliyayaal sheeggan oo

---

[1] MKH: Miilaadiga Ka Hor. (Turjumaha)

[2] Qi: Waxa sidoo kale loo qoraa Ch'I & Chi. Waa boqortooyo hore oo ka dhisnayd Shiinaha. Waxa la aasaasay qarnigii 11^{aad} MKH, magaalo madaxdeeduna waxa ay ahayd Yingqiu. (Wikipedia)

[3] Shiine: China. Jamhuuriyaada Shacbiga ah ee Shiinaha. Dal dhaca bariga Asia. Waxa uu daboolaa bed dhan 9.596.961 Km^2. Waa dalka adduunka ugu dadka badan oo waxa lagu qiyaasaa in ay ku dhaqan yihiin bulsho dhan 1.400.050.000. oo qof (2019). Caasimaddiisu waa Beijing. Magaalada ugu weyni waa Shanghai. Afkiisuna waa ka ugu weyn adduunka ee ay dad u dhashay (Native) ku hadlaan. (Wikipedia)

sharaf ku leh ciidannimadooda, taasina waxa ay sababtay in uu dhabbadoodii dabaguro oo isaguna uu taliye noqdo, khibraddoodii oo uu dhegta ka maalay iyo tiisa uu ka ilsugtayna uu isku daro, ka dibna uu gaadho derejadii waayahaas ugu sarraysay ee aqoonta iyo falsafadda ciidannimada laga gaadhi jiray oo ahayd Ustaad ama Macallin weyn, waana macnaha magaciisa Tzu.

Waxa iyaguna koriyay aqoontiisa ciidannimo waayihii uu noolaa oo ay Shiinuhu u qaybsanaayeen 130 dawladood, loollan adag oo dhexmarayna ay aakhirkii goobta isugu soo hadheen 5 boqortooyo oo waaweyni. Dhacdooyinkaasina waxa ay sii kobciyeen garaadkiisii ciidannimo.

Sun Tzu hindisihiisa aqooneed awgii, waxa ay boqorka la taliyayaashiisii ku qanciyeen in uu kaalmaysto Sun Tzu. Ka dib waxa uu boqorkii ka dalbaday in uu u soo gudbiyo qoraal uu ku soo koobayo tijaabooyinkii dagaalladiisa.

Markii uu boqorkii dheehday xirfadihiisii, waxa uu toyday in uu tijaabadaas ku horfuliyo, waxa uuna ku tijaabiyay jaariyadihii madaxtooyada.

Waxa uu qaab ciidan u abaabulay 300 oo ka mid ah booyasooyinkii madaxtooyada, waxa uuna u qaybiyay laba garab isaga oo mid walba hoggaamiye u asteeyay, waxa uuna ku amray in ay diracyadii iyo saanaddii dagaalkaba dhammaystirtaan. Ka dib waxa uu warsaday: "ma kala

saaraysaan hawlaha foolaadka[1] iyo saynta[2] iyo sidoo kale garabka midig iyo garabka bidix?" "haa" ayaa ay ugu warceliyeen. Waxa uu u faalleeyay hannaanka amarrada ciidanka loo siiyo isaga oo leh: "marka ay durbaannadu yeedhaan ee aan idinku idhaahdo "bidixjeeso" waa in aad amarka qaadataan, amarraduna sidaas ayay u dhacayaan. Waxa ay ugu jawaabeen: "hawraarsan". Sidaas ayay tijaabadii ku bilaabantay.

Sun Tzu amarradii ayuu bixiyay isaga oo leh: "midigjeeso" balse xaawalayadii[3] qosol ayay la daateen. Mar kale ayuu amray: "bidixjeeso" waaba ka dar oo dibi dhal. Markaas ayuu yidhi: "haddii ay amarradu cad yihiin oo la fahmi karo, balse aan la fulin, gefka geeshka ayaa iska leh". Isaga oo durbaannada gacantiisa ku garaacaya ayuu saddex jeer amarradii bixiyay balse waa laga hoosqaadi waayay.

Waxa uu amray in loo keeno garsooraha ciidanka. Ka dib waxa uu warsaday: "goobta dagaalka maxaa lagu ciqaabayaa askariga amardiiddada sameeya?" waxa uu ugu jawaabay: "ciqaabtu waa qoorgooyo!" halkaas ayuuna ku

---

[1] Foolaad: ciidanka hordhaca ah ee daandaansada nacabka ama weerara amaba difaaca. (Turjumaha)

[2] Sayn: ciidan weynaha qarsoon ee kolka uu foolaadku soo baqe cararo jilibka u aasta cadaawaha. (Turjumaha)

[3] Xaawalay: Afo. Oori. Magac loogu yeedho haweenka, gaar ahaan kuwa da'aadda dhexdhexaadka ah ku jira, xaasaskana u badan. (Turjumaha)

amray in labadii hoggaamiye ee dumarkaas lagaga takhaluso haweenka kale hortooda.

Boqorku waxa dhacaya wuu dheehanayay. Waxa uu u soo diray Sun Tzu nin dhegta u saara farriin ah: "waan ku kalsoonaaday kartidaada aad ku la dhaqmayso ciidankaaga, labadan adeegtana waa labada qasrigaba ii nuuriya ee cafi". Waxa uu ugu warceliyay Sun Tzu boqorkii: "hawsha aad tuurta ii saartay awgeed waxa jira amarro aanan fulin karin!" labadii jaariyadoodna halkii ayay ku nafwaayeen.

Isla qacdiiba waxa la magacaabay laba kale oo ahaa kuwii ugu dhodhowaa boqorka, tababarkiina waa la sii anbaqaaday. Haweenkii mid ka mid ahi iyada oo aanay limiqsan (ilbidhiqsan) ayay amarradii sidooda u fuliyeen. Markaas ayuu Sun Tzu boqorkii ku yidhi: "Dumarkaagii waxa ay diyaar u yihiin bandhig ciidan in ay dhigaan, dantii aad doontaanna waad ku fushan kartaa. Amar uun, iyaga ayaa bad iyo berriba jiidhaya'e!

Waxa uu boqorkii u magacaabay jananka guud ee ciidammada, waxana uu ciidan 30 kun ah kaga adkaaday ciidan 200 oo kun ah, magaciisiina daafaha Shiinaha iyo boqortooyooyinkii la jaarka ahaa oo dhan wuu ku baahay.

Dhiganahan "Loollan" waa buugga looga dabqaatay dhammaan dagaalladii waaweynaa ee caalamka ka dhacay. Hoggaamiyayaashii kalitaliska ahaana isaga ayaaba indho

iyo dhego u ahaa. Dagaalkii Khaliijka[1] ee 1991[kii] askari kasta oo Maraykan[2] ah shandaddiisa ayuu ugu jiray, kaalinta uu ugu jiro ciidannimada awgeed.

Dhanka Japan[3] shirkadaha waaweyn ee ka dhisanina aqoonta hoggaaminta, maaraynta iyo meelmarinta waxsoosaarkooda waxa ay ugu laabtaan talooyinka iyo tilmaamaha uu buuggani bixinayo.

---

[1] Dagaalkii Khaliidka ee 1[aad]: Dagaalkii Iiraan iyo Ciraaq. Waxa dagaalkaas ay ula baxeen Ciraaqiyiintu Qaadisiyadii Saddaam, Iiraaniyiintuna dhankooda waxa ay ula baxeen Difaacii Muqaddaska ahaa. Waa dagaal ka dhexsocday Iiraan iyo Ciraaq September 1980[kii] - August 1988[kii]. Waxa uu galaaftay nafaha hal milyan oo qof. Waxa uu ka tegay khasaare $400 bilyan ah. dagaalkaas oo socday 8 gu' waxa uu noqday dagaalkii ugu muddada dheeraa qarnigii 20[aad]. Dagaalkaas ayaa dhalay dagaalladii xigay ee Khaliijkana. (Wikipedia)

[2] Maraykan: USA. United States of America. Dalka ku magacaaban hoggaaminta adduunka waayahan. Waxa uu dhacaa qaaradda Ameerikada Waqooyi. Waxa uu ku fadhiyaa bed dhan 9.833.520 Km^2. Waxa uu ka kooban yahay 50 ismaamul. Tirada dadkiisu waa 328.239.523 qof (2019), waana dalka saddexaad ee ugu dadka badan adduunka, dadkiisuna way kala isirro duwan yihiin oo badigoodu way u hayaameen ama waa loo raray. Magaalo madaxdiisu waa Washington D.C. magaalada ugu dadka badanina waa New York. (Wikipedia)

[3] Japan: Nippon. Nihon (sida ay ugu dhawaaqaan dadka u dhashay). Dal boqortooyo ah oo jasiirad ah oo dhaca bariga Asia. Waxa uu ka koban yahay 5 jasiiradood oo waaweyn oo kala ah : Hokkaido, Honshu, Shikoku, Kyushu iyo Okinawa. Caasimadda dalkaas iyo magaalada ugu weyni waa Tokyo. Bedka uu ku fadhiyaa waa 377.975 Km^2. Bulshada ku dhaqani waa 125.960.000 oo qof (2020). Waa dalka 11[aad] ee adduunka ugu dadka badan. (Wikipedia)

Waxa uu dhiganahani ka kooban yahay 13 cutub oo mid waliba waayihiisa iyo waccarihiisa wato. Waxa uu u dhigan yahay hannaan tiro ah. Hoggaamiyaha dhaqangaliyaana waa hubaal - si Alle mooyaane - in aanu iilanayn.

Buuggani kuma koobna xirfadaha dagaalka oo keliya, ee siyaasadda, ganacsiga iyo maaraynta nolosha caadiga ahba waa looga dabqaadanayaa. Ruuxii u dhugma yeeshaana dhito[1] ayuu kaydsaday dharaar uun waxtari doonta. Dhinacyada dagaallada, dhaqaalaha, siyaasadda iyo arrimaha kale ee bulshooyinka dhexmaraba, haddii istiraatiijiyadaha buuggan loo raaco keliya libin laga ma gaadhayo ee xataa waxa lagu guulaysanayaa in jabka iyo khasaaraha laga dheeraado.

Layaab malaha in buuggan la qoray muddada 25^{ka} qarni ka badani uu ilaa hadda noqdo mid noloshan ugub la jaanqaadi karaya, walibana lagu tiriyo mid ka mid ah 100^{ka} buug ee sooyaalka adduunka wax ka beddelay, waxana loo yaqaanaa kitaabka muqaddaska ah ee istiraatiijiyadaha ciidanka.

Waxa uu dhiganahani xoogga saarayaa joogtaynta midnimada shacabka iyo hoggaamiyahooda, ama ciidanka iyo taliyihiisa. Labadaas haddii ay wax kala geeyaa haba

[1] Dhito: Caanaha labada caanamaal adhiga laga liso ee la kaydiyo si loo lulo oo subag iyo ciir looga bixiyo. (Turjumaha)

yaraadeen'e dhexmaraanna, sidii la doonayay qorshena in aanu u soconayn ayuu muujinayaa.

Erayga "Dagaal" waa eray la bah ah erayada shidaal, qoraal, qodaal, ceebaal, socdaal iwm. Waxa uu u qaybsamaa laba waaxood oo la isku ladhay, waana Dag iyo Aal. Dabagalaha aal waxa lagu lifaaqaa wax kasta oo la tibaaxayo in ay goobtaa waafi ku yihiin oo ku badan yihiin. Tusaale; meesha ay ku badan yihiin waxyaabaha tamarta iyo dabka laga dhaliyaa waa shidaal. Warqadda ay xuruufta ku qorani ku badan yihiin waa qoraal. Beerta kolka la faadhfaadhayo waa qodaal. Ceebta wadnagooyada ahina waa ceebaal. Erayga dag waa amarka erayga Dagniin. macnihiisuna waa mardabayn ama xeeladayn ama khiyaamayn. Kolka aynnu labada eray ee dag iyo aal isku lifaaqno waxa ka soo baxaya macne ah "meel ay xeeladayntu ku badan tahay." Sidaa awgeed; waxa ay Soomaalidii hore qirsanaayeen in uu dagaalku yahay xeelad. Ka dib magacan xeesha dheer ayaa ay ugu wanqaleen iyaga oo aan af kale ka soo xigan. Nebigeenuna ﷺ waa kii yidhi: "Dagaalku waa xeelad".

Eerayga tujumaaga
Aadan Khadar Cali (A.Sahan)

Loollan, Tilmaamaha taliyayaasha

Dhiganahan Loollan ee Sun Tzu, waa mid ka mid ah dhigmooyinka xardhan ee laga soo gaadhay sooyaalkii hore ee adduunka. Waa mid ka mid ah buugaagta ugu caansan uguna mudan ee ilbaxnimooyinkii Shiinaha. Sababta illaa hadda kaalinta uu adduunka ugu jiraa u dhinmi wayday waxa loo aaneeyaa, in uu ilaa waayahan ugub ee wax waliba sidoodii iska dooriyeen ku habboon yahay oo xeerarkiisu ay yihiin isla kuwii waayahaasba la adeegsan jiray ee qaabka fulintu uun kala geddisan tahay. Waxana uu noqday buugga istiraatiijiyadeed ee Aadame qoray ee ugu mudan ilaa hadda.

Sun Tzu waxa uu talooyinkan iyo tilmaamahan u soo tebiyay taliyayaashii la ayniga iyo ayaamaha ahaa in ay ka waxtaransadaan, waxana aad u dhaqangaliyay tilmaamihiisa dagaalyahan sharafeedyadii sheegganaa ee

reer-Japan[1] ee Samurai[2], sida ugu mudanna waxa uga sii faa'idaystay hoggaamiyaha ku suntan kacaankii horumarka Shiinaha ee Mao Zedong[3]. Ilaa haddana ganacsatada waaweyni isaga ayay istiraatiijiyadaha uga shidaalqaataan oo ku tiirsan yihiin.

Maadaama ay adkayd helitaanka agabka qoraalku, waxa uu adeegsaday Sun Tzu weedho koobkooban oo ereyadeeda uu u doortay si ka fiirsi leh, afnaqayaashana aad ayaa ay u daaliyeen tarjumiddoodu, adeegsigana si ku habboon ayaa ay ugu soo baxayaan marka laga dhabaynayo ee fal loo rogayo.

Hindisaha Dagaalku xoogga saari maayo keliya sida libinta lagu gaaadhayo, ee waxa uu iyadana aad ugu nuuxnuuxsanayaa sida looga dheeraado jabka iyo

---

[1] Japan: Nippon. Nihon (sida ay ugu dhawaaqaan dadka u dhashay). Dal boqortooyo ah oo jasiirad ah oo dhaca bariga Asia. Waxa uu ka koban yahay 5 jasiiradood oo waaweyn oo kala ah : Hokkaido, Honshu, Shikoku, Kyushu iyo Okinawa. Caasimadda dalkaas iyo magaalada ugu weyni waa Tokyo. Bedka uu ku fadhiyaa waa 377.975 Km^2. Bulshada ku dhaqani waa 125.960.000 oo qof (2020). Waa dalka 11^{aad} ee adduunka ugu dadka badan. (Wikipedia)

[2] Samurai: Dagaalyahanno u dhashay Japan oo sharaftooda iyo addeecista hoggaamiyahooda wax walba ka hormarin jiray, kana jiray Japan qarnigii 12^{aad} ilaa 1870^{kii}. (Wikipedia)

[3] Mao Tse Tung: Waxa sidoo kale loo yaqaanaa Chairman Mao, waa aasaasihii jamhuuriyadda shacbiga ah ee Shiinaha, waxana uu ka talinayay 1949^{kii} ilaa 1976^{kii}. (Wikipedia)

khasaaraha, iyada oo aan dagaal la galin in guul la soo hooyana wuu higsanayaa.

Allifaha dhiganahani waxa uu u doortay in uu aragtiyihiisa iyo mabda'yada uu ka qabo dagaalka iyo xeeladihiisa ku soo tebiyo weedho koobkooban oo murti mug weyn xanbaarsan, waxa uu u dhigay qaab ah hadal waa kii kooban ee kaalingal ah. Waa buuggii ugu horreeyay ee inta ilaa hadda laga warqabo waaxda dagaalka laga qoro, waxana uu xanbaarsan yahay falsafad ku habboon arrin kasta oo la aasaaso oo madax iyo minjo leh, maarayn iyo maamulna u baahan.

Dhiganahani kuma uu koobsan hindisaha dagaalka oo keliya, ee waxa lagu allifay Shiinaha oo qudha in ka badan 1,000 buug oo dhammaantoodba sharraxaya buuggan "Loollan" istiraatiijiyadihiisana ka shidaalqaadanaya oo fasiraya.

Heerka uu ka gaadhay ahmiyadda uu u leeyahay aqoonta dagaalka, taliyihii reer-Ingiriis ee Marshal Montgomery[1] waxa laga hayay: "waa lamahuraan in dhiganahan Loollan lagu daro liiska cutubyada waxbarashada ee kulliyadda ciidanka ee caalamka oo dhan!"

---

[1] Bernard Montgomery: Waxa lagu naanaysaa Monty iyo The Spartan General. Waa sarkaal Ingiriis ahaa oo ka qayb qaatay dagaalladii waaweynaa ee 1aad iyo 2aad ee dunida. (Wikipedia)

Hoggaamiyihii hore ee Shiinaha ee Mao Tse Tung isaguna waxa uu xusay in dhiganahan Loollan uu ka taageeray dagaalkii uu la galay Japan.

Dagaalkii Khaliijka askari kasta oo Maraykan ahi wuu sitay buuggan Loollan, waxana u la socotay cajalad duuban oo uu ka dhegaysanayo sharraxiisa. Sidoo kale; sirdoonka Maraykanku mid mid ayay u akhristaan oo u daraaseeyaan dhiganahan.

Isla markii uu dhiganahani ka soo if baxay degaankiisii Shiinaha waxa uu markiiba u gudbay Japan, waxana qiimayntiisa, sharraxiisa iyo dhaqangalintiisa u fadhiistay saddexdii ugu mudnaa ee ugu sarsarreeyay dagaalyahannadii Samurai, iyaga oo doonaya in ay kala soo dhexbaxaan istiraatiijiyad ay ku mideeyaan Japan oo hal calan ku hooskeenaan.

Qoraa la odhan jiray Griffith oo ahaa dadkii ka soo qayb qaatay Dagaalkii Labaad ayaa xusay ka dib markii uu hawlgab noqday isaga oo ku sii kaabaya buug uu leeyahay sida ay Japan uga faa'idaysteen murtida Sun Tzu iyo dhiganihiisan Loollan: "reer-Japan waxa ay ka baahiyen buuggan 100 dabcadood, murtida iyo aragtiyaha Sun Tzuna sidooda ayay u dhaqangaliyeen, iyaga oo dhan kasta oo nolosha ahba ku dhaqaya, xataa ganacsiyadooda iyo waxsoosaarkooda!"

gugii 1772[kli] ayaa markii ugu horraysay loo afnaqay dhiganahan Faransiis. Haddana waxa loo afnaqay Ruush

1860[kii]. Waxa loo rogay Ingiriisi gugii 1910[kii], markaas ayayna faaftay dabcaddiisa Ingiriisida ahi. Ka dibna Jarmal. Tarjumaadihii danbe ee afafka kale oo dhanna waxa loogu tiirsaday taas Ingiriisida ah, sababtuna waxa ay ahayd afnaqahaas Ingiriiska ah oo aqoon durugsan u lahaa afka Shiinaha iyo xeerarka ciidannimada. Caannimadiisu waxa ay caalamka u soo if baxday dagaalkii 1[aad] markii laga soo doogay. Taliyayaal badanina waxa ay qireen goobo lagu hoobtay oo birta la iska aslay in laga dheeraan lahaa dhibaatadooda, haddii dhiganahan istiraatiijiyadihiisa la dhaqangalin lahaa oo taliyayaasha, hoggaamiyayaasha dagaalka iyo qolyaha go'aanka fuliyaa ay haysan lahaayeen. Sidoo kale; qorshayaasha, khiddadaha iyo xeeladaha uu soo gudbinayo dhiganahani kuma habboona keliya xeerarka dagaalka ee waxa ay aad ugu habboon yihiin caalamka ganacsiga, maamulista iyo maaraynta.

Waxa uu muujinayaa dhiganahan "Loollan" in haddii ay hoggaamiyayaasha iyo madaxdu isku hawlaan in ay ka guulaystaan cidda ay la loollamayaan dhan ciidan, dhan ganacsi, dhan degaan, dhan maamul iyo dhankii loo dayaba, ay muhim tahay in inta ay awoodaan ee xog ah ay ka ururiyaan liddigooda. Waxana uu halkaas ka soo saaray xeer ah, haddii aad si waafi ah u garanaysid cadawgaaga, adiguna aad is garanaysid, waxa aad awooddaa in aad

boqol dagaal iyo loollan gasho, adiga oo ka aamin qaba jab iyo hungo.

Dhiganahan waxa uu u dhigay allifihiisu qaabka ugu huritaanka yar, uguna gaaban ee looga dhabayn karo libinta, waana 13 cutub oo ka bilaabmaya dejinta qorshaha, kuna soo afmeermaya qaramaynta sirdoonka. Sababtuna waxa ay ahayd in Sun Tzu laftiisu uu ahaa dadka ka soo horjeeda dagaalka, una arka in aanu ahayn xalka loollannada. Balse markii uu arkay in uu yahay dagaalku lamahuraan ha la diido ama ha la doono'e dhacaya, ayuu dhan kale uga wareegay oo damcay in uu u dejiyo qaabka ugu huritaanka yar, uguna habboon ee lib looga keeni karo dagaalka, waliba iyada oo aan goobta dagaalkaba la xaadirin oo aanay ajal keli ahi go'in, cidina aanay afqudhmin.

Buuggan waayaha ayaa in badan oo ka mid ah lumiyay oo intan aynnu haynaa waa waax ka mid ah uun, balse inta ka luntay intan ayaa inagaga filan oo qorshayaasheeda lagu meel mari karaa. Dhan kasta oo aad la maagto in aad ku dhaqangalisidna wuu ku habboon yahay. In kasta oo aqoon ugub iyo adduun horumaray maanta la joogo; haddana xeerarkiisu sidii ayuun bay u dhaqangalayaan, walaw qalab kii hore ka geddisanba ha la adeegsado'e.

Istiraatiijiyadaha uu buuggani gudbinayaa waa kuwo aad ugu sii habboon dawladaha taagta daran ee laga xooggan yahay. Mudnaanta uu leeyahay daraadeedna,

maktabad kasta oo weyn oo adduunka ku taalla mid ka mid ah waa laga helayaa. Waxa uu xanbaarsan yahay qaacido guud oo ah, xeer kasta oo dagaalka lagu dhaqangaliyo, nolosha caadiga ahna waa lagu dhaqangalin karayaa.

Sun Tzu waxa loo aqoonsan yahay in uu yahay aabbaha sirdoonka Shiinaha. Macneheeduna ma aha in aanay Shiinaysku isaga hortii aqoonin basaasidda, ee waa in uu isagu muujiyay mudnaantooda, xeerar iyo qorshayaal u sameeyay, qaybqaybiyay, waax waliba waxa ay ku filan tahay iyo kaalinta ay ku jirtana muujiyay.

Waa ninkii ugu horreeyay ee sameeya mareeg sirdoon ah oo isku xidhan oo dhan walba ka dhisan oo ka dhammaystiran. Qorshayaashaas uu dejiyayna waxa ka faa'idaystay Mao Tse Tung oo halgankii dheeraa ee uu soo maray ku soo dhaqan galiyay. Waxa iyaguna sidiisa u dhaqangaliyay Japan ka hor intii aanay galin dagaalkii Pearl Harbor[1]. Maamulka Ingiriiskuna waxa uu u qaybiyay askartiisii ku sugnayd Ceylon[2] waayihii Dagaalkii Labaad.

Waxa uu qabay Sun Tzu fekrad ah in dalka la difaaco iyada oo dhaqaalaha lagu ilaalinayo heerkiisu, in ay u baahan tahay basaasiin iyo sirdoon joogto ah oo

---

[1] Dagaal ay si kedis ah waayihii dagaalkii 2aad Japan ugu duushay Maraykanka oo degganaa jasiiraddaas. (Wikipedia)

[2] Dagaal dhacay 5rii April 1942kii oo Ingiriiska oo fadhiya degaanka Ceylon (iminka Sri Lanka) ay ku duuleen Japan. (Wikipedia)

dhaqdhaqaaqa iyo firfircoonida cadaawaha si joogto ah u la socda. Sirdoonnimaduna in ay tahay shaqo sharfan oo mudan. Sidoo kalena ay lagamamaarmaan tahay in sirdoonkaas iyo hoggaamiyayaasha sarsare ay xidhiidh toos ah lahaadaan.

Si sirdoonku uu u noqdo mid sugan oo dawladda gacanta ugu jira oo daacadnimadiisu aanay u xagaldaacinna ay lamahuraan tahay in dhanka hantida iyo maaddiga loogu roonaado. Taasi waxa ay u sahlaysaa in iyaguna ay ku iimaan qabaan, inta ay si kale ku soo dhowaysan karayaana maamulkooda u soo gacangaliyaan, illeen cadka rag isku raacay waa hunguriye.

Xisbullaah iyo hungada sheeko baralaydii gulufyada.

Ka dib dagaalladii lagu hoobtay ee dhexmaray Xisbullah[1] iyo Yuhuudda[2] gugii 2006[dii], xabbad joojin la galay intii ay socotay waxa la daraaseeyay sababta dagaalkaas bisha oognaa loo liicin kari waayay kooxdaas yar, waxana fekraddii laga dhexhelay dhiganahan uu faylasoofka iyo maanmaalka Shiinayska ahi qoray 25[ka] qarni ka hor.

---

[1] Xisbullaah: Hezbollah. Urur siyaasadeed iyo dagaalyahanno Muslimiin ah oo Shiico ah oo ka dhisan Lubnaan. Markii uu dhintay hoggaamiyohoodii Cabbaas AlMuusawi, waxa xilkaas qabtay Xasan Nasrullaah. Waxa ururkan aasaasay 1982[kii] Maxamed Xuseen Fadlullaah, Raaqib Xarbi, Cabbaas AlMuusawi iyo Subxi Addufayli. Aasaaskiisii hore waxa maalgalisay Iiraan, hoggaamiyayaashiisuna waa dad raacsan Cali Khamenei. (Wikipedia)

[2] Yuhuud: Jews. Hebrew. Waa dadka ka soo farcamay 12[kii] wiil ee uu dhalay nebi Yacquub oo ahaa ina nebi Isxaaq oo sii ahaa ina nebi Ibraahim. Waxa ay haystaan diinta Yuhuudiyadda (Judaism). Tiradooda guud waxa lagu qiyaasaa 13.428.300 - 14.095.000 oo qof. Waxa ay ku baahsanaayen adduunka oo dhan ka hor intii aanay qabsan Falastiin ee ka dhisan dawladda. Waxa ay aamisan yihiin in degaanka u dhexeeya wabiga Niil iyo wabiga Furaat ay iyagu leeyihiin oo Ilaahay u ballanqaaday. Waxa ay aaminsan yihiin in ay iyagu yihiin Aadamaha caadiga ah ee adduunkan daraadooda loo abuuray, dadka kale oo dhammina ay yihiin addoommo iyaga in ay u adeegaan loo abuuray. Waana ummadda ugu badan ee uu Quraanku dhacdooyinkooda iyo sooyaalkooda ka warramay. (Wikipedia)

Sababta kooxdaas yar ee la dagaallamaysa ciidanka nidaamsan ee ka cududda iyo caddadka badan, kana hubka iyo saanadda badan, Sun Tzu isaga oo ku gorfaynaya dhiganihiisan waxa uu u arkaa, in colka tirada yar ee qaata qaabka difaaca ah ay lamahuraan u tahay in ay gebi ahaanba qarsoomaan si aanay cadaawuhu uga ilsugan. Marka uu ciidanka duullaanka ahi awood weyn yahayna khidaddan macneheedu ma aha in ay baqdin ama dhibaato kale horseedayso, ee waa in ay daalinayso oo haantaa hadhuubla' ku ridayso colka duullaanka ah. marka heerkan la joogana xirfadyahanku waa ka is la eegta weerarcelinta iyo weeraritaanka daandaansiga ah.

Napoleon Bonaparte[1] mar kasta wuu akhriyi jiray dhiganahan "Loollan" xataa dagaallada ku dhufo oo ka dhaqaaqda ah marka uu maaggan yahay.

Madaxweynihii Maraykanka ee Theodore Roosevelt[2] isaguna aad ayuu u akhriyi jiray dhiganahan, heer uu naqtiimay ku dhowaad 100 jeer.

---

[1]Napoleon Bonaparte: (1769^{kii} - 1821^{kii}) waa hoggaamiyihii kacdoonkii Faransiiska, ahaana boqorkii Faransiiska ee 1804^{tii} ilaa 1814^{kii}. (Wikipedia)

[2] Theodore Roosevelt: waa badhasaabkii New York ee muddooyinkii u dhexeeyay 1899^{kii} - 1901^{dii}, waana madaxweyne ku xigeenkii 25^{aad} ee Maraykanka muddooyinkii u dhexeeyay March ilaa September 1901^{dii}, waana madaxweynihii 26^{aad} ee Maraykanka ee arriminayay intii u dhexaysay 1901^{dii} - 1909^{kii}. (Wikipedia)

Sababta kooxdaas yar ee la dagaallamaysa ciidanka nidaamsan ee ka cududda iyo caddadka badan, kana hubka iyo saanadda badan, Sun Tzu isaga oo ku gorfaynaya dhiganihiisan waxa uu u arkaa, in colka tirada yar ee qaata qaabka difaaca ah ay lamahuraan u tahay in ay gebi ahaanba qarsoomaan si aanay cadaawuhu uga ilsugan. Marka uu ciidanka duullaanka ahi awood weyn yahayna khidaddan macneheedu ma aha in ay baqdin ama dhibaato kale horseedayso, ee waa in ay daalinayso oo haantaa hadhuubla' ku ridayso colka duullaanka ah. marka heerkan la joogana xirfadyahanku waa ka is la eegta weerarcelinta iyo weeraritaanka daandaansiga ah.

Napoleon Bonaparte[1] mar kasta wuu akhriyi jiray dhiganahan "Loollan" xataa dagaallada ku dhufo oo ka dhaqaaqda ah marka uu maaggan yahay.

Madaxweynihii Maraykanka ee Theodore Roosevelt[2] isaguna aad ayuu u akhriyi jiray dhiganahan, heer uu naqtiimay ku dhowaad 100 jeer.

---

[1]Napoleon Bonaparte: (1769^{kii} - 1821^{kii}) waa hoggaamiyihii kacdoonkii Faransiiska, ahaana boqorkii Faransiiska ee 1804^{nii} ilaa 1814^{kii}. (Wikipedia)

[2] Theodore Roosevelt: waa badhasaabkii New York ee muddooyinkii u dhexeeyay 1899^{kii} - 1901^{dii}, waana madaxweyne ku xigeeenkii 25^{aad} ee Maraykanka muddooyinkii u dhexeeyay March ilaa September 1901^{dii}, waana madaxweynihii 26^{aad} ee Maraykanka ee arriminayay intii u dhexaysay 1901^{dii} - 1909^{kii}. (Wikipedia)

Maanmaal Masaari ahaa oo la odhan jiray Anwar Cabdilmalik isaga oo muujinaya mudnaanta uu leeyahay akhriska dhiganahani ayuu ka qoray qormo ciwaankeedu ahaa: "Bilawga sooyaalka ee Suez[1] ilaa Qaana" waxana uu ku xusayay sannadguurada 50aad ee ka soo wareegtay markii ay dawladda Masar[2] gacanta ku dhigtay kannaalka Suez iyo duqayntii Yuhuudda ee tuulada Qaana oo Liibiy[3]a dhacda. Waxa ay ku dileen duqayntaas 60 rayid ah oo 37 ka mid ahi ay ahaayeen carruur. Waxa uu Anwar si gaar ah u soo qaatay qodobka uu ku xusayo Sun Tzu, in ku guulaysiga 100 dagaal aanay muujinayn xirfadyahannimo iyo xeeldheeraan dagaal, ee in aad

---

[1] Suez Canal: Gacanbiyood gacankurimis ah oo badda la heer ah biyo ahaan. Waxa uu isku xidhaa Badda Cad ee Dhexe (Mediterranean) iyo Badda Cas (Red Sea). Waxa sidoo kale loo yaqaanaa xadka Afrika iyo Asia oo waxa uu maraa Masar. Waxa la qoday 1859kii - 1869kii. Dhererkiisu waa 193.3 Km². (Wikipedia)

[2] Masar: Egypt. Dal ka tirsan Bariga Dhexe oo dhaca waqooyiga Afrika. Bedka uu ku fadhiyaa waa 1.010.408 Km². Tirada dadkiisu waa 100.075.480 qof (2020). Waa mid ka mid ah dalalka ugu taariikhda weyn adduunka oo waa degaannadii ay ka talin jireen faraaciintii. (Wikipedia)

[3] Liibiya: Libya. Dal ka tirsan gobolweynaha Maqrib ee waqooyiga Afrika. Waa dalka 4aad ee ugu weyn Afrika iyo dalka 16aad ee ugu weyn adduunka oo dhan. Waa dalka 10aad ee ugu badan adduunka dhanka kaydka macdanta saliidda ah ee ku duugan. Caasimaddiisa iyo magaalada ugu weyni waa Tripoli. Magaalada 2aad ee ugu weynina waa Benghazi. Bedka uu ku fadhiyaa waa 1.759.541 Km². Bulshada ku dhaqanina waa 6.871.287 qof (2018). (Wikipedia)

cadawgaaga jabiso adiga oo aan la dagaallamini ay tahay xirfadyahannimada iyo xeeldheerida dagaalba.

Waxa uu dhiganahani kaalin mug leh u galayaa, mudnaanta uu u leeyahay dagaalka hurimaysani kooxaha yaryar ee u loollamaya ka xoraynta dhulkooda ciidan dhisan oo qalabaysan oo ka mug weyn.

Xisbullaah ayaa loollankaasna kala hortagay Yuhuudda. Dagaalladii ay la galeenna waxa ay sanka kaga toleen in ay ka baxaan koonfurta Lubnaan[1] sannadkii 2000, ka dib 22 sannadood oo ay aaggaas Yuhuuddu haysteen. Xoghayihii guud ee Xisbullaahna dhawr jeer ayuu xusay in dagaalyahannadiisa ay u adeegsadaan dagaalka kooxaysan ama hurimaysan la dagaallanka ciidanka Yuhuudda ee qabsaday Lubnaan. Daraaseeyayaashii arrinkaas qiimaynayayna waxa ay ogaadeen in dagaalyahannada Xisbullaah ay adeegsadeen istiraatiijiyadda raadgadashada iyo dhuumaalaysiga, sidii uu ku taliyay maanmaalkaas Shiinayska ah ee Sun Tzu ka hor 25^{ka} qarni.

---

[1] Lubnaan: Lebanon. Dal dhaca galbeedka Asia. Caasimaddiisa iyo magaalada ugu weyni waa Beirut. Bedkiisu waa 10.452 Km^2. Dadka ku dhaqani waa 6.859.408 qof (2018). Waa dal la deggenaa ilaa 7000 ee sano ee idlaaday. Waa dalkii ay ku dhaqnaayeen dadkii Phoenicians. (Wikipedia)

Sidoo kale; hore ayuu u guulaystay dagaalkaas hurimaysani oo markii uu Maraykanku galay Vietnam[1], waa kuwii u babbac dhigay iyaga oo hurimo iyo kooxo yaryar ah ciidankii markaas sheeganayay awoodda adduunka ugu weyn! Aakhirkiina sannad ka dib markii ay uusmiirten ee dhiigmiirteen ee uu arkay in aanu wanaag uga soo naasacaddayn, ay ku kallifeen in uu ka agab ursado oo ka soo cararo, ka dib markii uu iska dabageeyay boqollaalka kun ee ciidanka ah, hub kasta oo uu haystay oo aan Nukliyeer[2] ahaynna uu ku tijaabiyay. Wax walba markii uu sameeyay ee uu ku fashilmay u babbac dhigga hurimahaasna sannadkii 1972[kii] waa kii ka firdhaday. Waxaas oo dhan waxa ay reer-Vietnam u geysteen Maraykan iyaga oo aan haddana wali goob dagaal kaga adkaan.

Dagaalkaas hurimaysan iyo dhuumaalaysigaasna waxa uu uga jeedaa in aad adigu intii aad awooddo ka qarin karto cadaawaha dhaqdhaqaaqaaga iyo ujeedooyinkaaga, isagana aad u soo banbixin karto in uu kuu muujiyo

---

[1] Vietnam: Social Republic of Vietnam. Dal dhaca koonfur-bari Asia. Waa dalka 15[aad] ee adduunka ugu dadka badan. Caasimaddiisu waa Hanoi. Magaalada ugu dadka badanina waa Ho Chi Minh. Bedka uu ku fadhiyaa waa 331.212 Km^2. Tirada bulshada ku dhaqanina waa 96.208.984 qof (2019). (Wikipedia)

[2] Nukliyeer: Waa tamar laga dhaliyo bu'da Atomka oo laga sameeyo hubka wax gumaada. (Wikipedia)

abbaartiisa iyo ujeedkiisaba. Waxa uu sidoo kale ku talinayaa ka dheeraanshaha dagaal toos ah in la la galo ciidan nafsad dagaal oo xooggan haya, haddii aadan hayn qorshe mug weyn oo aad si kedis ah cadawga wadnaha u jarayso.

Sidoo kale; waxa uu tibaaxayaa in marka aad cadaawaha ka yar tahay aad u baqe guurto si uu kuu moodo in aad baqe carartay oo uu kuu baacsado, ugana soo boxo dhufaysyadiisa iyo goobaha uu xushay, awoodiisuna u wiiqanto oo aad kamiinnadaada ugu ridato.

Cutubka 1[aad]: Dejinta Qorshayaasha

1- Aqoonta dagaalku waa rukunka ugu mudan jiritaanka dawladda, balse sooyaalka lagu ma hayo arrin dagaalka ka hoog iyo halaag badan, waayo; kuma koobnaado barxadda la isku gumaadayo ee birta la is kaga aslayo oo keliya, ee ruux kasta baradiisa ayuu ku duraa (dhibaa), waxa uuna keensan karaa in dal dhisan dhulka la la simo.

2- Dagaalku waa arrin nolol ama geeri ah, waxa uu kuu horseedi ammaan iyo badhaadhe ama halaag iyo baaba'. Sidaa awgeed; waa qodob mudan in aan la dhayalsan. Shaxeeyaha ugu wanaagsanina waa ninka cadowgiisa ciila isaga oo aan dagaal la galin. Sidaas daraadeed; waa in aadan qorshayaasha dagaalka sahashan oo salfudayd iyo si surmaseegto[1] leh u saadaalin, ee aad maan iyo maal iyo muruqba ku bixisaa.

3- Haddii aad u hollato in aad ku keliyaysato guusha goobta waa in aad ku xisaabtantaa shan qodob oo go'aamiya cidda gacan sarraynaysa.

4- Shanta arrin ee inan ragba kuu gadh qabanayaa waa:

(1) Siyaasadda.

---

[1] Surmaseegto: Marka aad meel gudin ku garaacaysid ee aadan hal meel kala eegan karin ee ay marba dhan kaaga dhacayso. Sheekabaraley Soomaaliyeedna waxa ay tidhaahdaa, ninka gabdhaha badan la dhashay ayaa cilladdaas leh. (Turjumaha)

(2) Cimilada.
(3) Degaanka.
(4) Shakhsiyadda hoggaamiyaha.
(5) Hannaanka iyo anshaxa.

5- Siyaasaadda: haddii uu nin labeed rafaad iyo ladnaanba la jaanqaadi karayaa guntiga dhiisha isagaga dhigo, waa arrinka keensada in ay bulshadu hoggaamiyahooda hal dabo la' u raacaan, iyaga oo aan noloshooda danaynayn, halisaha ka waabanayn, xanuunka gocanayn. Siyaasaddu waa miiq (dun) yar oo isu haya madaxda iyo madaniga, haddii uu hoggaamiyuhu gigtiro wuu go'i, haddii uu liciifiyana wuu lulmi.

6- Cimilada: waa qodobka kuu muujinaya habeenka iyo maalinta, kulaylaha iyo qaboobaha, roobabawga iyo noocyadooda, dabaylaha iyo jihooyinkooda, kala wareegga xilliyada sannadka iyo dhammaan wixii ku saabsan xaaladaha jawiga iyo saamayntooda si aad ugaga shidaalqaadato xeeladahaaga.

7- Deegaanka: waa qodobka kuu kala saara kala sarraynta dhulka ee kuraha, dulaha, buuraha, togagga iyo wabiyada leh, meesha nabdoon iyo bahalo galeenka, dhulka waafiga ah iyo jiqinjiqista cidhiidhyoon, bedka iyo baaxadda arlada iyo filashada heerka nolosha iyo geerida.

8- Shakhsiyadda hoggaamiyaha: waa arrinka muujiya taliyaha samaantiisa iyo silloonaantiisa, murtdiisa iyo maan yaridiisa, daacadnimadiisa iyo dadcunnimadiisa,

daadahayntiisa iyo dibindaabyayntiisa[1], kudhiciisa iyo kamaaggiisa (labalabayntiisa), kakanaantiisa iyo foolnugaylkiisa. Ruuxa u hanqaltaagaya hoggaaminta amaba ah hoggaamiyuhu waa in uu ku astaysnaadaa tilmaamo door ah oo ay ka mid yihiin:

(1) U-dul'lahaanshaha natiijada hawlgalkaaga: haddii shaqada aad qabateen adiga iyo kooxdaadu aad ku fashilanto cid eed ha ka saarin. Haddii aad ka lib keentana Ilaahay ku mahadi, ciddii ku garab gashay iyo naftaadana ha hilmaamin ee abaali, islaweyni iyo tookhna ha ku sagootiyin.

(2) Is garo. Marka aad naftaada qiimaynayso ka run sheeg si aad uga ilsugato dhanka aad ka dhantaalan tahay iyo dhinaca aad ka dhisan tahayba. Haddii aad dareento in aad ugu sidato cidda kaa agdhow qarso, jidhdiidku qalbiga Aadamaha si yar ayuu ku geyalayaaye.

(3) Cidda aad u taliso tusaale toolmoon u ahow: Aadamuhu hadba cidda ka derejo sarraysa waxa uu u arkaa in ay ka mudan yihiin, waana dabcigiisa in in uu ku daydo sidii ay asaxaabtuba nebiga ﷺ ugu dayan jireen. Waa in tilmaan kasta oo aad ka rabto iyagu in ay yeeshaan aad adigu marka hore lahaataa. Ogow; taliyaha xilliga dagaalka ciidankiisa ka dhexdirira,

[1] Dibindaabyo: Waxyeello. Hagardaamo. Luggooyo. (Turjumaha)

ciidankiisu way ka guulaysan og yihiin ka dusha ka maamula ciidankiisa.

(4) Horumari kartida guutadaada: ku abuur nafahooda kalsooni iyo han, hawlgalka aad u dirtana faalladiisa ha ku dheeraan ee sii qodobbada ay ka duulayaan uun, waxa aad ka baranaysaa hindisayaal hawlaha noocaas ah loo fulin karo oo aad hore u moogganayd'e. Arrinna ha ku dhaqaaqin xataa haddii uu go'aankiisu meel kuu saaran yahay adiga oo aan kala tashan, waxa ay isu arkayaan in ay agtaada qiimo weyn ka leeyihiin'e.

(5) Badhaadhahooda ka tali: cabashooyinkooda ka dhegayso, gacan qabo kooda tabaalaysan, garab sii kooda waayaha adduun ku soo hamaansadeen, arrimaha dhacayaana haddii aanay ka da' weyneyn ku wargeli maskax ayay kugu biirinayaane.

(6) Hawshaada gudo: hawlgalkaaga hoggaami oo ahow foolaadka kooxdaada, wax waliba sida aad u qorshaysay uma dhacayaan, adduunyaduna waa hadhka labadiisa gelin'e. higsiyadaadu ha noqdaan kuwo filashada guulaysigooda laga qabaa ay weyn tahay, aanay ahayn... bilawgaba guutadaadu way niyad jabayaan. Hawlna ha u dhaqaaqin adiga oo aan baahiyaheedii tifaftiran oo idibilan.

9- Hannaanka iyo anshaxa: waa habdhiska abla'ablaynta geeshka iyo guutayntooda, u qaybinta darajooyinka

saraakiisha iyo kala mudnaantooda, adkaynta dhabbooyinka gurmadka iyo sugidda ammaankooda, iyo sidoo kale maaraynta maalka ciidanka iyo qarashaadkooda.

10- Shantaa qodob waa u muhim in uu hoggaamiye kastaa ka baaraan degaa. Taliyaha sidooda u dhaqangaliyaana isaga ayaa guusha daadahaysta, dagaalna kuma fashilmo.

11- Si aad u saadaaliso laba geesh oo gorodda is daray kooda guusha guddoonsanaya iyo ka loo gebagebaynayo waa in aad ka suuradisaa toddoba qodob adiga oo is barbardhigaya labadoodaba.

12- (1) Labada hoggaamiye midkee ayaa ku dheggan anshaxa colaadda?

(2) Labad taliye midkee karti iyo maarayn badan?

(3) Labad ciidan midkee ayaa ay la jiraan jawiga iyo deegaanku?

(4) Labada geesh midkee anshaxa dagaalka fulin og?

(5) Labada col midkee cudud iyo hub iyo hanti ku gacan sarreeya?

(6) Labada col midkee saraakiishiisu aad u tababaran yihiin una diyaarsan yihiin?

(7) Labada col midkee ayaa joogtayn og hannaanka abaalmarinta iyo ciqaabista askarta?

13- Natiijada toddobadaas is barbardhig ayaan ka odorosi (saadaalin) karaa colka ceebta iyo caydha la huleelaya iyo geeshka guusha iyo gacansarraynta la gabbal dhacsanaya.

14- Hoggaamiyaha raaca talooyinkaygan ee fuliyaa waligiiba isaga ayaa gacan sarraynaya, wuuna istaahilaa in uu ummadda sii gadhwado. Halka hoggaamiyaha iska dhegatira ee indhaha ka meermeeriyaa uu jabba jab ku sugayo ee ceebtiisu cirka isku shareerayso, mana istaahilo in uu ummadda hagardaamo intaa ka badan sii gaadhsiiyo ee waa in xilka laga xayuubiyaa.

15- Inta aad u guclaynayso ka waxtaransiga talooyinkaygan, wax kasta oo ka baxsan seeraha dagaalka balse duruufaha adag ku garab qabanaya, marka aad kuftidna ku kicinaya, dhankaaga soo marso oo ha u siinin cadowga fursad in uu kaaga lib sarreeyo wixii ka baxsan soonaha (aagga) colaadda.

16- Iyada oo loo eegayo duruufuhu hadba sida ay u gedgeddoomayaan, waa in uu jananku qorshayaashiisa hadba dhan u geddiyaa. Taasina waxa ay kallifaysaa inta aan qorshaha hore lagu dhaqaaqin balaaba haddii uu hirgali waayo in qorshihii beddeli lahaa uu miiska sii saarnaado.

17- Wax kasta oo ku lug leh dagaal iyo colaadi waxa ay ku dhisan yihiin xeelad. "Nebigeenu ﷺ waxa uu yidhi: (Dagaalku waa xeelad)".

18- Sidaa awgeed; marka aynnu duuli rabno waa in uu cadowgu dareemaa in aynnu habayacsan nahay. Marka aynnu ciidanka dagaal galinayno waa in uu nacabku i noo maleeyaa in aynaan far dhaqaajinayn. Marka aynnu ka ag

dhowaano waa in uu ina moodaa in aynnu maalin socod u jirno. Kolka aynaan aag fog u soo lahaynna waa in uu is moodsiiyaa in aynnu u soo dhowaannay.

19- Waligaa hayso wax aad ku khiyaamayso cadawgaaga, muujiso in nidaamkii safafka ciidankaagu isku dhexdaatay, waxa aad ku noqotaa mindi dhul taalla, dabadeedna cadowgaaga cidhibtir oo cayn walba u laa.

20- Haddii uu colka cadowgu is diyaariyo, isu diyaari la dirirkiisa, haddiise uu kaa abaabul roonaado ka gaagaabso.

21- Haddii uu liddigaagu seeflabood yahay galinsii in uu dhirfo (xanaaqo) oo caynaddiisa iyo ceebtiisaba muujisto, adiguna tusi in aad taagdaran tahay, si uu cawaandiyad iyo macangagnimo u la soo baxo oo aad u liiliijiso.

22- Marka uu nacabkaagu nasanayo nafta ku dhib oo ha siin fursad uu ku nafiso. Haddii ay colkiisu urursan yihiinna kala firdhi. Kolka aad adigu raaxaysanaysid isaga sii rafaadi oo ragaadi si aanu kuugu soo riddacelin oo aanu kuugu soo labakaclayn.

23- Marka aanu nacabkaagu abaabullayn ku duul oo isaga muuji meel aanu kaa malaysanayn, si aanay lug iyo laani isugu gaadhin oo baalladaymood iyo dhaqaaqjoogsi kudhaca uga tirtiraan, waxa uu noqonayaa libaax qoyay, libaax qoyayna gorayo la mood.

24- Talooyinkaas millatari waa dhabbaha guusha ee ha carrabaabin oo cid ha la wadaagin inta aadan ciidansan ka dangaadhin ka hor.

25- Jananka dagaal ka libqaataa, waa nin xisaabo badan ku sii dejistay saldhiggiisa ka hor intii aanu dagaal u soo banbixin. Jananka dagaalka lagu jabiyaana waa nin aan arrimo badan ku sii xisaabtamin, dhubuqdhubuq horena dhabannahays danbe ayay leedahay. Sidaa awgeed; mar kasta oo xisaabahaagu bataan waa mar kasta oo aad guusha hantido. Mar kasta oo ay xisaabahaagu yaraadaanna waa mar kasta oo aad jab la huleesho. Aniga oo ka duulaya sida uu jananku u tixgaliyo xisaabaha uu maanka gashanayo waxa aan hadda caddayn karaa ninka dagaalka ku jabaya iyo ninka libinta ku geeraaraya, saadaal waayeelna hubanti suburdhe[1] ka sed roon.

* * *

[1] Suburdhe: Ninka aan talo uu ku meelmaro lahayn, talo la siiyayna qaadan. gabadhana waxa la yidhaahdaa Sunbo. (Turjumaha)

Cutubka 2^{aad}: Dagaal-oogista

1- Hawlgalka dagaalka, haddii ay goobta ku diyaarsan yihiin kun gaadhi faras (tigniko) oo fudud, aadna u dheeraynaya oo loo abaabulay weerarka, iyo in la mid ah oo culculus oo loo abaabulay difaaca, iyo boqol kun oo askari oo lug ah, heensahoodiina u dhan yahay oo sita sahay ku filan socdaal 1,000 Km ah. Qarashka ku baxaya gudaha dalka iyo goobta uu geeshku gaardiyayo oo ay ku jiraan martisoorkii martida iyo ergada u soo hoyata gulufka iyo hagaajinta wixii hallaysma sida gaadhi farasyada jaba iwm, kolka la isu geeyo waxa ay la degayaan hanti lagu qaramayn lahaa boqol kun oo askari oo kale.

2- Marka uu duullaanku kaa dhab yahay, haddii ay guushu dabadheeraato hubka ciidanku wuu hawlgabaa, hiyigooduna wuu damaa. Kolka aad magaalo go'doomisana adiga ayaa xooggaaga wiiqay.

3- Haddii ay dabadheeraato muddada duullaankaagu, ilaha dhaqaale ee dawladdu ma kaafiyayaan qarashaadka dagaalka. Kolkaa haddii aad dagaal u hanqal taagto degdeg ku gal oo ku gebagebee.

4- Hadda oo uu hubkaagii hawlgabay, colkaagii nafsad jabay, cududdaadii wiiqantay, ilahaagii dhaqaalena engegeen, madaxda kele ee deriska ayaa ku soo hunguraynaya oo hoos u dhacaagaas ka waxtaransanaysa, marka ay hawl adduun halkaa maraysana - si kasta oo aad u murti iyo maskax badan tahay - ma awoodid in aad is hortaagto taxanaha dhacdooyinka ah ee ku abtirsanaya xaaladdaas.

5- Sidaa awgeed; in kasta oo aynnu maqallay hoogga ka dhasha dagaalka dhubuqdhubuqda iyo degdegga lagu galo, haddana xirfadda dagaal kuma xidhna dib u dhigga muddada colaadda. In kasta oo ciidanka degdegga ku dagaal galaa uu jab ka dhaxlo, haddana dedejinta xilliga colaaddu waxa ay yaraysaa hantida ku baxaysa geeshka, waxa ay xoojisaa hanka colka, caajisnimadana way tirtirtaa, kaadsiinyuhuna kaalin mug leh ayuu ka qaataa oogista dagaalka. (1977[kii] Ethiopia qodobbadii ugu mudnaa ee ay ku jabisay xooggii qaranka Soomaaliyeed waxa kow ka ahaa muddadii fasaxa la siiyay ciidanka iyo hakashadii la galiyay dagalka ee ulakaca iyo kaska loo sameeyay).

6- Sooyaalka lagu ma hayo waddan inta uu dagaallo dabadheeraaday galay lib ka daadahaystay.

7- Ninka ka dheregsan hoogga iyo halaagga colaadda dabadheeraata, ayuun baa fahmi kara mudnaanta ay leedahay in dagaalka degdeg lagu soo afmeeraa.

8- Askariga khabiirka ahi kama dhursugo in ciidan cusub loo soo qafaalo, wuuna og yahay in laba jeer wax ka badan aan gurmad loo soo dirayn. Sidaa awgeed; waa in uu degdeg ku soo afmeeraa colaadda oo goobta badhtanka u galaa isaga oo aan waxba sii dibdhiganayn, sidaasna uu liddigiisa kaga lib helaa.

9- Saanadda dagaalka ka soo qaado xaruntaada, balse qadhaabka iyo quudka ciidanka ka xoog cadowgaaga. Sidaas ayuu colkaagu ku helayaa cunto ku filan iyo mid ka badanba. Ciidanku haddii ay dhadhamiyaan xoolaha cadowgooda way ku mamayaan[1], taasina waxa ay galinsiinaysaa inta ay u dagaallamayaan qaddiyaddooda ka badan in ay u dagaallamaan qadhaabkooda oo ay cadowgooda cidhibtiraan.

10- Khasnadda dawladda oo kacdaa waxa ay horseeddaa in gurmadka ciidanka bulshada samafal iyo cashuur ahaan looga uruuriyo, taasina shacabka ayaa ay saboolinaysaa oo dawladda karhaya.

11- Dhan kale haddii aynnu iska taagno; ciidanka oo meel dhow ka dagaallamaa waxa ay kicisaa qiimaha badeecadda dalka, sixir bararkaasina shacabka ayuu fuuqsadaa. Sidaas daraadeed; waxa habboon in haddii ciidan kugu soo fool yeesho aad halka uu joogo kaga duldegto intii uu gudahaaga kugu xasuuqi lahaa.

---

[1] Mam: Marka ay waxaruhu abab baranayaan. (Turjumaha)

12- Marka ay hantidii shacabku fuuqbaxdo waxa culays ku noqonaysa cashuurtii ku waajibtay, taas oo ay u arkayaan dhib dhib biirsatay.

13- Kolka ay hantidu fuuqbaxdo, awoodduna wiiqanto, guryaha shacabku way badhmadhnaanayaan, dhaqaalahooduna 30% wuu burburayaa, halka ay dawladduna khasnaddeeda ka saarayso hagaajinta gaadhifarasyada jabay, doorinta fardaha daalay, diracyada, halmaddada[1], leebabka, qaansooyinka, warmaha, gaashaannada iyo dibida xooggan ee jiidda gaadhifarasyada saanadda dagaalka sida, halkaasna waxa ku burburaysa 40% dakhligii guud ee dalka.

14- Sidaa awgeed, jananka murtiilaha ahi waxa uu quudka iyo qadhaabka ciidanka kaga talagalaa in uu ka helo qaniimada uu cadowga ka fara maroojiyo. Halka gaadhifaras ee sida agabka cadowgu waxa uu u dhigmaa labaatan gaadhifaras oo colkaagu wato, waayo; halka gaadhi waxa uu jidka ku soo sahayanayaa labaatan gaadhi sahaydood. Sidoo kale; halka tan ee ah cuntada cadowgu waxa uu u dhigmaa labaatan khasnadood oo ka mid ah kaydka dawladdaada.

15- Hadda, si ay ciidanku cadowga shafka ugu qaataan waa in aad ka cadhaysiisaa colkaaga, waa in aad u xaqiijisaa magaca iyo maalka ay ka dheefayaan qaniimada cadowga

---

[1] Halmad: Koofiyadda birta ah ee dagaalka. 'Halmet'. (Turjumaha)

haddii ay jabiyaan iyo in uu askari kastaaba nasiibkiisa ka helayo.

16- Sidaa darteed; kolka toban gaadhi iyo ka badan la furto, waa in aad abaal marisaa askarigii gaadhigii ugu horreeyay furtay. Calamada cadowga ee ka babanaya gaadiidka nacabkana waa in aad ka xoorto oo uu calankaagu ka babado, waa in aad gaadiidkaas ku dartaa gaadiidkaaga oo dagaalka u adeegsataa, waana in maxaabiista aad dagaalka ka soo qafaalatay aad si samaan ah u la dhaqantaa oo aadan layn.

17- Xeeladaha noocaas ah ayaa loogu yeedhaa: ku korodhsiga saadkaaga sahaydii cadaawaha.

18- Haddaba; hammigaaga ugu weyn ee dagaalku ha ahaado dhabaynta libinta ee yaanu ahaan dabadheeraynta colaadda.

19- Waxa halkaas laga dhadhansanayaa in uu hoggaamiyaha colku masuul ka yahay nolosha dadweynaha. Isaga ayaa loo aanaynayaa hadba halis iyo hoodo ta ay bulshadu ku bariisanayso.

* * *

Cutubka 3^{aad}: Xeelad-ku-Weerarka

1- Marka aynnu u eegayno hindisaha dagaalka, in aad qabsato waddanka cadaawuhu isaga oo dhisani way kaaga door roon tahay in aad gacanta ku dhigto isaga oo burburay. In aad qafaalato ama aad hantido colka cadaawaha oo bedqabaana way kaaga roon tahay in aad gumaaddo oo kala firdhiso.

2- Sidaa awgeed; in aad duullaan kasta libin ka gaadhaa ma aha hoggaaminta ugu wanaagsan, ee in aad dagaal la'aan foolaadka colka cadaawaha jebiso ayaa ah hoggaaminta ugu sidata.

3- Hindisaha ugu doorka roon ee janannimadu waa: in aad ka hordegto oo fashiliso qorshayaasha cadowgaaga, ka dib aad kala dhex'xuluulato dhabbooyinka isu gurmadka colkiisa, ka dibna aad goobta ku hunjaaliso geeshkiisa. Balse siyaasadda ciidannimo ee ugu liidataa waa in aad go'doomiso magaalo dhismayaasha qalcadeheedu dherer iyo dhidibba muggood u buuxaan.

4- Qaado xeerka odhanaya: waa in aadan go'doomin magaalo dhufaysyo adadag leh mar haddii aanay dani ku badin, waayo; diyaarinta saanadda iyo sahayda dirireed ee dhufaysyadaas liciifinayaa waxa ay qaadanaysaa saddex bilood oo buuxa. Kaartooyinka iyo xeeladaha duminta ama u dhicista dhufaysyadaasina waxa uu qaadanayaa saddex bilood oo kale.

5- Jananka aan hanan karin naftiisu goor aan ku habboonayn ayuu ciidankiisa ku amraa in ay huujuumaan qalcaddaas, kolkaas ayay iyaga oo qudhaanjo masaalkeed ah ku didaan, ka dib hilfaha ayaa loo qaadaa oo saddex dalool mid ahaan ayaa dhegta dhiigga loo daraa magaaladii oo sideedii ah, taasina waa mid ka mid ah dhibaabaha go'doominta magaalooyinka.

6- Sidaa awgeed; jananka buuniga ahi waxa uu galinsiiyaa colka cadaawuhu in uu u hogto oo gorodda u laalaadiyo dagaal la'aan, waxa uu furtaa bandarradooda go'doon la'aan, waxa uuna gacanta ku dhigaa maamulkooda dhibaabe la'aan.

7- Isaga oo aanu hal askari ka afqudhmin (dhiman) ayuu waajahaa awoodda boqortooyada cadowga, sidaas ayayna isaga oo aanu nin keli ahi ka dhiman ku dhammays tirantaa libintiisu. Qorshahaas ayaa la yidhaahdaa xeelad-ku-weerar!

8- Xeerka dagaalku waa: haddii uu ciidankeenu colka cadaawaha toban laabkii yahay waa in aynnu

go'doominnaa, haddii uu shan laabkii yahay waa in aynnu weerarnaa, haddii uu laban laabkii yahayna waa in aynnu colkeena u qaybinaa laba dhinac oo qolona ay dagaallanto, qolada kalena kammiin ahaan looga dhigo.

9- Haddii ay isu dhigmaan labada ciidan dagaal waynnu u banbixi karnaa, waxana markaa libinta ku geeraaraya jananka khabiirsan. Haddii kala duwanaanshaha tirooyinka collaalka aanay dani i noogu jirinna waa in aynnu ka gaagaabsannaa dirirta. Haddii ay tiro ahaan ina qarqinayaanna col kaa badan iyo biyo kaa badaniba way ku hafiyaane waa in aynnu goobta ka baxnaa.

10- In kasta oo haddii ay hurintu dagaal gasho ay mintidayso haddana aakhirka waa loo awood sheegtaa oo la muquuniyaa, lana qafaashaa. Mar haddii laga gacan sarreeyana miskiin ayaa misko la fuulo leh.

11- Hadda jananku waa gaashaanka dawladda, haddii uu dhan walba ka dhisan yahay qaranku wuu xoogganaanayaa, haddiise ay dhankiisa dhinnaanshiiyo ka jiraan qaranku wuu liciifayaa.

12- Waxa jira saddex hab oo uu jananku geeshkiisa jab iyo hoog ugu soo jiido.

13- (1) In uu jananku colkiisa ku amro hore u socod ama dib u gurasho isaga oo mooggan in ay ciidanku amarkaas fulin karaan iyo in kale, qorshahaasna waxa lagu magacaabaa hagardaamaynta ciidanka.

14- (2) In uu hoggaamiyuhu u maamulo geeshka sida uu u maareeyo boqortooyada isaga oo mooggan duruufaha uu abbaarayo colku, taasina waxa ay ciidanka ku abuurtaa deggenaan la'aan.

15- (3) in uu hoggaamiyuhu sarkaallada u magacaabo si aan kala sooc lahayn oo aanu nin waliba halka uu ku habboon yahay iyo maqaamka uu mudan yahay ku qiimayn, isaga oo mooggan xeerarka ciidannimo ee la xidhiidha la qabsiga duruufaha, taasina waxa ay durtaa kalsoonida ciidanka.

16- Marka ay xubnaha ciidanku ka aamin baxaan hoggaamiyahooda, waa hubaal in madaxda deriska uu dhibaabe ka imanayo, taasina si sahlan ayaa ay ciidanka dhexdiisa qalalaase uga abuuraysaa, inta uu ciidanku isku murugsan yahayna guuli waa wali.

17- Sidaas waxa aynnu ku yaqiinsanaynaa in ay jiraan shan arrimood oo guusha sees iyo saldhig u ahi:

(1) Ninka guulaystaa waa ka yaqaan goorta uu dagaal galayo iyo goorta uu gaagaabsanayo.

(2) Ninka guulaystaa waa ka yaqaan sida taagdarrida iyo xoogganaantaba loo dagaallamo ee loo dabin dhawrto.

(3) Ninka guulaystaa waa ka ciidankiisa oo dhan derejo kastaba ha lahaado'e nafsadda iyo go'aanka midaysan ku dagaal galiya.

(4) Ninka guulaystaa waa ka sida dhammayska tiran isu abaabula ee suga in uu cadowgiisa fursad aanu diyaarsanayn ku gaado.

(5) Ninka guulaystaa waa ka ciidan ahaan muggii u buuxa ee aanu boqorku hannaankiisa faragashan. (waa marka uu boqorku amarro guud bixiyo, taliyuhuna uu u fuliyo hadba sida ay u la qummanaato).

18- Sidaas darteed; haddii aad cadowgaaga iyo naftaadaba aqoon buuxda u leedahay, kama werweraysid boqol dagaal oo aad gali doonto natiijadooda. Haddii aad si wanaagsan naftaada u taqaanno balse aadan cadowgaaga aqoonin guushii aad gaadhaba guul darro ayaa kaaga danbaynaysa. Haddiise aadan cadowgaaga iyo naftaada midna aqoon, waa hubaal in dagaal kasta hilfaha laguu qaadayo oo aadan libin af saarayn. In aad cadowgaaga taqaannaa waxa ay ku bartaa sida aad isu difaacdo, in aad naftaada taqaanaa waxa ay ku bartaa sida aad u weerartanto, weerarkuna waa sirta difaaca, difaacuna waa qorshaha weerarka.

Cutubka 4^{aad}: Taatikada Xeeladaysan

1. Dagaalyahannadii xariifiinta ahaa ee waayadii hore waxa ay iska ilaalin jireen wax kasta oo jab iyo liidnimo u soo jiidaya, nacabkoodana kuma ay degdegi jirin iyaga oo aan ka helin fursad ay lix iyo laba isugu celiyaan oo madaxooda minjo ugu rogaan.
2. In aynnu jabka ka digtoonaanaa waa masuuliyad innaga tuurta i noo saaran, balse in aynnu cadowga guusha ka hantino nacabka laftiisa ayaa i noogu deeqaya oo waa gef yar oo uu galay oo aynnu ku gaadno oo kaga guulaysanno uun.
3. Dagaalyahanka buuniga ahi waxa uu ka dabin dhawrtaa jabka isaga oo qarinaya dhaqdhaqaaqiisa iyo raadkiisaba, balse ma xaqiijin karo in uu cadowga ka guulaysanayo iyo in kale, waayo; cadawgu isaga ayaa isu kaa dhul dhigaya oo isu kaa jebinaya haddii uu gefo.
4. Waad garan kartaa habka aad nacabkaaga ku muquuniso adiga oo aan ku qasbanayn in aad ku dhaqaaqdo oo muquuniso.

5. Ka digtoonaanta jabku waxa ay kaaga baahan tahay in aad ku dhegganaato raacitaanka taatikada difaaca, balse in aad jebin karto cadaawuhu waxa ay kaaga baahan tahay in aad fursad is dhigasho ah ku gaaddo. Haddii aadan cadowgaaga muquunin karinna waa in aad difaac xooggan gashaa.
6. In aad difaac gashaa waxa ay tibaaxaysaa in ay awooddaadu wiiqantay, halka uu weerarku qeexayo in aad adeegsatay awood dheeri ah.
7. Jananka buuniga ku ah difaacu waxa uu ku dhuuntaa dhusinka arlada, halka jananka weerarka buuninimada u lihina uu sida hillaaca roobaad meesha uu u hanqaltaago ugu habsado. Sidaa awgeed; dhan haddii aynnu iska taagno waxa aynnu awoodaynaa in aynnu isu badnaano oo is ilaalino, dhanka kale haddii aynnu ka eegnana waxa aynnu ka dhabayn karnaa guul aan dhinnaansho iyo dhantaalnaan midna lahayn.
8. In aad dheehato guusha marka uu qofka shacabka ahiba arkayaa ma aha indheergaradnimada ugu sidata ee in aad aragto biqilku inta aanu dhulka ka soo foocin oo aad suuradiso aayaha iyo waxa ahaan doona ayaa ah indheergaradnimo.
9. Ma aha indheergaradnimadu in aad ku duusho oo qabsato nacabkaaga, ka dibna ay dawladda oo dhammi ku tidhaahdo: "nin labeed iyo inangoogaar" ee raganimada ugu sarraysaa waa in aad si dhammaystiran oo dhakhso ah

wax u qorshayso, si feejiganna u duusho, shaxda cadowgaagana ka hordegto oo kashifto, dagaalkana aad ku guulaysato adiga oo aan dhiigba daadin.

10. In aad tin dhulka taalla kor u rujisaa ma aha awood badnaan. In aad onkodka roobka maqashaa ma aha dhego nuglaan. In aad dayaxa iyo cadceedda dheehataana ma aha indho fiiqnaan.

11. Ninka ay dadkii hore u yaqaaneen guulwadaha xariifka ahi ma aha ka libinta hela uun, ee waa ninka sida sahlan ee raganimada leh guusha uga dhabeeya. Ninka meel dhow wax ka dhugtaa si dhib leh ayuu guusha ku hantiyaa, ninka isha dheerina si fudud ayuu libinta ugu geeraaraa.

12. Guuliba guusha ay uga danbayso waxa ay janankaas u soo jiidaysaa sumacad iyo karaamo uu ka dhaxlayo murtida uu u adeegsaday libintaas iyo sidoo kale qadderin lagu qiimeeyo go'aankiisa iyo geesinimadiisa.

13. Waxa uu libinta gaadhayaa isaga oo aan wax gef ah gelin, gef ka dhawrsanaantuna waa tiirka ugu horreeya ee xaqiijiya guusha, taas oo aad ka taransanayso in aad qabsato cadaawe hore u jabay. Mar kasta oo aad gefka ka gaaf wareegtaana waa mar kasta oo aad libinta ku geeraarto.

14. Dagaalyahanka khabiirka ahi waxa uu ku gabbadaa gabbaadka uu hubiyay in aanay guul darro ku haleelayn,

mana lumiyo fursadaha is dhigashada cadowgiisa ee uu kaga libin helayo, kuna gumaadayo.

15. Hoggaamiyaha istiraatiijiyadda dagaalka ka dheregsani, waxa uu goobta ku duulaa oo dagaalka bilaabaa ka dib marka uu guusha geed sii saarto, ka dibna dhabbada yari dhabbada weyn ayay kugu riddaaye libinba libin ayuu ku sugaa. Marka qorshaha aad ku guulaysan karto aad dejisato u hoggaami halyayyadaada goobta, dagaalkana xeelad ku bilaw si cadawgaagu u moodo in ay xeeladiba xeelad kale kugu simayso.

16. Hoggaamiyaha dhammayskatirani waxa uu kasbadaa xeerka dagaalka, si adagna waxa uu ugu dhegganaadaa hannaanka iyo anshaxa colaadda, sidaas ayayna guushu ugu gacan gashaa oo uu u maareeyaa.

17. Marka aynnu addeecayno hannaanka ciidannimada waa in aynnu:

1) Cabbirnaa bedka dhulka uu ku fadhiyo geeshka nacabku si aynnu u garano cududdiisa.
2) Qiimaynaa mugga colka cadaawaha si aynnu u ogaanno xaaladdiisa iyo duruufaha nololeed ee ku gedaaman.
3) Xisaabinnaa tirada ciidankiisa si aynnu u yaqiinsanno inta aynnu kaga dhacayno iyo sida aynnu u abbaarayno.
4) Is barbardhignaa awooddeena iyo ta cadowgeenna si ay i noogu caddaato dhanka aynnu kaga aadaynaa.

5) Guusha saadaalinnaa si aynnu u odorosno dhanka jabku inaga haleeli karo.

18. Ciidanka guulaystay marka kefad la la saaro colka jabay waxa ay isu noqonayaan dhadhaab lagu miisaamay xabbad quruurux ah.

19. Degdegsiinyaha ciidanka libinta ku helay waxa la moodaa biyo ka soo burqanaya buur fiiqeed oo ku arooraya dhusinka arlada.

* * *

Cutubka 5^{aad}: Tamarta Iyo Karaanka

1- Maamulka iyo maaraynta guutooyinku waxa ay la mid tahay maamulidda hurin dhawr nin ah, waxa ayna ku xidhan tahay hadba sida aad u nimdaamiso ciidankaaga, waana in aad ciidankaaga u qaybqaybisaa cutubyo, kooxo, unugyo iyo hurimo, mid walbana aad hoggaamiye u astaysaa.

2- In aad ku dagaal gasho ciidan mug iyo miisaan leh iyo in aad ku dagaallanto hurin yari waxba kuu ma kala duwana mar haddii aad si habsami ah u adeegsato astaamaha iyo ishaarooyinka ciidannimo ee amarrada xanbaarsan.

3- Si aad u xaqiijiso in uu geeshkaagu weerarrada laba dhacaya ee cadaawaha iska xejin karo oo aanay safafkiisu furfurmayn waa in aad u carbisaa ciidankaaga si toos ah iyo si dahsoonba oo aad cadawga si toos ah iyo si dahsoonba u daandaansataa si aad u baqe galiso.

4- Boorrinta iyo guubaabadu waa in ay laabaha colkaaga u saamaysaa sida uu dhagaxdixeedku u bashaaqiyo (jabiyo) beedka. Taasna waxa aad ku kasban kartaa in aad barto ciidankaaga goldaloolooyinka iyo dhinacyada ay ka dhisan yihiin iyaga iyo cadowguba.

5- Hannaan kasta oo loo dagaallamaa waxa uu isugu biyo shubanayaa laba mid uun: hab toos ah iyo hab dahsoon. Habka tooska ah waxa loo adeegsadaa in goobta lagu weeraro oo warmaha la is waydaarsado. Habka dahsoonna waxa loo adeegsadaa in guusha lagu xaqiijiyo oo libinta lagu rumeeyo.

6- Taatikada aan tooska ahayni waa seeska libinta, haddii faa'idadeedu ay mar barriiqatana waa hubaal in mar labaadka laga waxtaransanayo oo waa sida ay dayaxa iyo cadceedduba u dhacaan ee u soo bidhaamaan.

7- Ma jiraan wax ka badan shan hannaan oo muusiga loo garaacaa; balse markii uu laxamaystihii isku dardaray waxa uu ka allifay laxanno badan oo aan waligood la maqlin.

8- Ma jiraan wax ka badan shanta midab ee aasaasiga ahi (Buluug, Huruud, Casaan, Caddaan iyo Madow) balse markii la isku qasay waxa ka soo baxay midabo badan oo aan waligood la dheehan.

9- Ma jiraan wax ka badan saddexda dhadhan ee aasaasiga ahi (Macaan, Qadhaad iyo Dhanaan) balse marka la isku daro waxa ka soo baxaya dhadhan aan hore loo dhadhamin.

10- Goobta dagaalka; ma jiraan wax ka badan laba hab oo loo weerartamaa, hab toos ah iyo hab dahsoon, haddii la mideeyo oo hal mar la wada'adeegsadana waxa ka dhalanaya taxane aan dhammaanayn oo ciidankaaga carbin u ah, cadowgaagana ceejin (cunaqabad) ku ah.
11- Labada hab (habka tooska ah iyo ka dahsoon) midiba mid ayuu kuu hoggaaminayaa oo sida goobada ayaanay lahayn bardhammaad, haddii labadaa hannaan la isku daro oo la wada'adeegsado bal yaa faallayn kara taxanaha guusha ah ee ka dhalanaya?
12- Ciidanka carbisan ee sida guubaabada leh loo dhiirrigaliyo, halka go'aanna lagu dagaal galiyaa marka uu weerar qaado sida uu daadku dhadhaabbada gaaddada ugu qaato ee u dulundulceeyo ayuu cadaawaha shafka ugu qaataa oo meel la degay iyo digaa baasaha uga dhigaa, waxana uu noqdaa sidii gardarro garab og.
13- Tayada iyo waxtarka go'aanka laga baaraandegay ee xilli ku habboon la fuliyay ciidanka wuu guulaa oo waxa uu gaadhsiiyaa heer ay sida uu gallaydhku ugaadha ugu haado cadowgooda dhawr baac dhusinka dhulka hoos u la gooyaan.
14- Sidaa awgeed; dagaalyahanka samcani (is hubaa) si argagaxgalin leh ayuu u weerartamaa, si dhakhso iyo ka fiirsasho lehna wax wuu u go'aansadaa.
15- Awoodda iyo tamarta dagaalyahanka dhabta ah waxa lagu qiyaasaa qaanso la gigtiray si leebka looga rido,

go'aankiisana fallaadh la ganay marka ay qaansada ka murkudayso.

16- Marka ay labada ciidan dhexda isu galaan ee bulaanka iyo sawaxanku baxaan, laga yaabaa in ay safafkaagu u muuqdaan in ay kala daateen, balse wax kala daadasho ahi ma jiraan. Marka uu kala googoosanka iyo jahawareerku colkaaga dagaalka ku jira haleelo laga yaabaa in ay ciidankaagu bilaa foolaad iyo sayn noqdaan, balse u babacdhiggoodii iyo adadkaanshahoodii is ma dhimayaan.

17- Haddii aad muujisanayso in ay safafkaagii burbureen si aad cadaawaha jillaab ugu tuurato waxa ay kaaga baahan tahay in aad si dhammaystiran u nidaamsanaato. Haddii aad muujisanayso baqe carar waxa ay kaaga baahan tahay geesinimo buuxda. Haddii aad muujisanayso taagdarro si uu cadawgaagu u moodo in uu canka ku gashan karo waa in aad lahaataa awood buuxda oo aad madixiisa minjo ugu rogi karto.

18- Nidaamsanaantaada oo aad ku gedaamayso daah isku dhexyaac ahi waxa keliya oo ay ku xidhan tahay in aad si wanaagsan u qaybiso cutubyada iyo hurimaha colkaaga. Geesinimadaada oo aad ku hoos'asturto fulaynimo mala'awaal ahi waxa keliya oo ay kaaga baahan tahay in ay awood badani kuu dahsoonaato. Xooggaaga iyo karaankaaga oo aad ku gedaanto go' tamar yari ahina waxa keliya oo uu kaaga baahan yahay taatiko carbineed.

19- Sidaa awgeed; ninka xarlifka ku ah in uu dagitaankiisa ku maamulo dhaqdhaqaaqa cadaawuhu, si ay mardabayntiisaasi ugu hirgasho wax ayuu u huraa oo dhib la'aan dheefi dheer, waxaasna nacabku wuu ku haadaa oo dafaa isaga oo moodaya in uu ninkaas wax u dhimay oo wax badso wax beel ayay dhashaa ayay ku noqotaa, balse jabkiisa ayaa halkaas ka bilaabma illeen jillaab loo ritay ayuu ahaaye.

20- Kolka aad cadaawaha jillaabta u dhigato isaga oo gaardiyaya ayuu ku soo qamaamaa[1], halkaasna waxa loogu sii diyaarsadaa ragga ugu sita ciidankaaga ee sheeggan, ka dibna waxa laga dhigaa injir bacad loo wadhay.

21- Dagaalyahanka xariifka ahi waxa uu u fiirsadaa saamaynta ka dhalata midaynta awoodda iyo karaanka colkiisa ee ma indha'indheeyo tamarta shakhsiyadeed, ka dib waxa uu ka baaraandegaa raggiisa nin walba waxa uu Ilaahay hibada u siiyay, mid walibana hawsha uu ka adag yahay ayuu u xil saaraa, sidaas ayuu ciidankiisa nin waliba karaankiisa ku faa'ideeyaa oo ay awooddoodu ku midawdaa.

22- Marka uu ka faa'idaysto midaynta karaanka colkiisa, tamar dheeri ah iyo dhiirrigalinna uu siiyo, waxa ay dagaalyahannadiisu noqonayaan sidii dhadhaabbo

---

[1] Qamaam: Xoolaha marka darka waraabka la keeno ee biyaha loo horayo ee ay ku soo yaacaan. (Turjumaha)

malaasan oo dul sare ka soo dulundulcoonaya. Dhadhaabku haddii uu saaran yahay oogada waa dabcigiisa in aanu socotaynini, balse haddii uu saaran yahay hoobad waa u dabci in uu dulundulcoodo oo sida lagu joojiyaa ay adkaato. Tamar siinta iyo xamaasad galinta ciidankana waxtarkeeda ugu weyni waa kaas. (ciidan aad u yar oo dhiirran ayaad guulo waaweyn ku soo hoyn kartaa).

Cutubka 6aad: Qodobbada Tamarta Iyo Taagdarrida

1- Ciidanka horqabsada goobta dirirtu ka dhacayso ee suga colkii cadaawihiisu wuu ka degganaan iyo karaan badan yahay geeshka goor danbe goobta iska soo xaadiriya oo waxa uu imanayaa kan danbe isaga oo daallan oo dabindhawranaya, illeen kamiinno iyo in jillaabo loo dhigtay ayuu iska ilaalinayaa oo wuu raadgadanayaaye. Sidaa awgeed; xirfadaha dagaalka waxa ugu mudan in aad cadowgaaga ku kallifto in uu goobta kugu la kulmo intii uu adiga sandulle kaaga dhigi lahaa in aad isaga aaddo oo la kulanto.

2- Sidaas awgeed; dagaalyahanka bislaaday waxa uu cadowgiisa ku kallifaa in uu u soo dhirindhiriyo[1] dhanka goobta, balse kama yeelo in isaga la soo dhirindhiriyo.

---

[1] Dhiraandhirin: Marka qof qodax laga saarayo ee hadba dhan laga riixo si ay kor ugu soo baxdo. (Turjumaha)

3- Si aad uga waxtaransato cadowgaaga, waa in aad sandulle kaga dhigtaa in uu sida aad la doonayso kuugu soo dhowaado, ka dib - adiga oo khasaare aanu ka soo kaban gaadhsiinaya - waa in aad galinsiisaa in aanu agagaarka ka soo ag wareegin. (marka hore jillaab u dhigo, marka uu soo qamaamana lix iyo laba isugu celi oo meel aanu ka kicin ku dhufo).

4- Haddii uu cadowgaagu nasanayo nafta ku dhib, haddii uu leeyahay nacabkaagu dhabbooyin wanaagsan oo ay u soo maraan quudka iyo gurmadku ka goo oo gaajo bad, haddii uu cadaawahaagu saldhig meel ka samaysanayana marka uu iska la daadiyo hunjaali[1] oo ku kallif in uu si habaqle ah u guuro.

5- Iska muuji oo uga horree meelaha uu ka difaac galayo ee uu naflacaariga ku la carceerayo, sida ugu dhakhsaha badanna u gaadh oo u qabso meelaha aanu kaa filanayn.

6- Ciidanku baaxad kasta ha lahaado'e inta uu doono wuu socon karaa, masaafada uu doonana wuu jari karaa isaga oo aan werwer iyo dabin dhawrasho midna lahayn, waa haddii uu qaadayo dhabbooyin ka aamin ah cadaawaha jidgooyadiisa.

7- Waad ka dhabayn kartaa libintaada haddii aad weerarto meelaha aan feejignayn ee cadaawuhu aanu difaacistooda isku hawlin. Waad is difaaci kartaa haddii aad gacanta ku

---

[1] Hunjaalo: Gujada sida arxan darrada ah wax loogu dhufto. (Turjumaha)

dhigto meelaha aan weerarka nacabka loo tuhmayn ee aaminka ah. Iyada oo ay sidaas tahay haddana waa in aad difaacaaga meel walba ka adkaysataa.

8- Taliyaha ku horreeya xirfadda weerarku ma yaqaano cadaawihiisu si uu isu difaaco iyo dhan uu iska adkeeyo. Taliyaha difaaca ku horreeyana ma yaqaano cadowgiisu meel uu ka weeraro iyo dhan uu kaga yimaaddo.

9- Baro oo ka dhabee adeegsiga hannaanka doqonimagaratada iyo dahsoonaanta ah. Baro sida loo qarsoomo ee indhaha dadka la isaga dhawro. Baro sida loo jabaqdhawrto ee dhawaqaaga loo qariyo. Sidaas ayaad hoggaanka ugu qabanaysaa cadaawahaaga oo u gadhwadaysaa, marka uu salbabakho ee salaqweedhaamo'e, oo xaajo nimaan ogayni indhahuu ka ridaa.

10- Ma haleelayo cadaawuhu in uu iska kaa caabiyo oo weerarkaaga ganafka ku dhufto haddii aad ka abbaarto meelaha uu ka taagtadaran yahay, dibugurasho iyo gabbaadsina waad ka haleelaysaa halista iyo wanqaraha cadaawaha, haddii uu dhaqdhaqaaqaagu ka dheereeyo ka nacbkaaga.

11- Haddii uu dagaalku kaa dhab yahay waa in aad cadowgaaga galinsiisaa in uu gubtahanyoodo, xataa haddii uu ku jiro gabbaad adag iyo godad gundheer. Waxa keliya ee aad samaynaysaa waa in aad ka weerarto cadaawuhu meelaha aanu iska hayn karayn ee uu markiiba ka soo

mudhayo dhufayskiisa ee kaa difaacanayo. (haddii uu nacabku ku soo weerarayna waa in aad jartaa jidadka isu gurmadkiisa iyo xidhiidhkiisa iyo kuwa haddii ay dibugurasho maagaan ay ka laabanayaanba, kuwaasina waxa ay galinsiinayaan in uu dib weerarka uga laabto si uu kaaga ilaashado. Haddii aad adigu weerarka tahayna waa in aad beegsataa hoggaamiyaha cadaawaha laftiisa).

12- Haddii aadan dagaal u jeelanayn cadowga xeeladee oo ka dhawr nacabku in uu gubtahanyoodo oo dhankaaga isu soo badiyo. Waa in aad ka feejignaataa raadadka aad kaga tegayso xero-askareedda aad ku habeendhaxday iyo jidadka uu geeshka cadaawuhu soo hayaba, waana in aad kaga tagtaa wax aanay nacabku macnaysan karayn oo fahmayn ujeedka laga leeyahay iyo waxa uu yahay midna si aanay kuugu soo dhiirran.

13- Marka aynnu dusha ka ilaalaynayno carbinta colka cadaawaha iyo meelaha uu ku kulmisan yahay innaga oo qarsoon oo aanay cidina ina arkayn waxa aynnu ciidankeenna ka dhigi karnaa mid is haysta, halka uu cadaawaha xooggiisu qaybqaybsamayo ee filqayo isaga oo innaga dhan walba inaga filanaya oo halkii uu inaga malaysanayaba ciidankiisa qayb ka mid ah u xilsaaraya.

14- Waxa aad ka dhigi kartaa ciidankaaga hal unug oo is haysta, halka uu ka cadowgu unugyo badan u googo'ayo. Sidaas ayaynnu ku noqonaynaa hal unug oo kartidiisii iyo karaankiisiiba isu geeyay oo waajahaya ciidan kala daatay

oo filiqsan. Taas oo inaga dhigaysa geesh mug iyo miisaan leh oo u babbac dhigaya hurimo yar oo filiqsan.

15- Haddii aynnu ku weerari karno awood ka hoosaysa ta aynnu leenahay nacabkeena, waxa haleelaysa dhibaabo iyo hagardaamo aanu ka soo kabanayn.

16- Goobta uu weerarkeennu ku abbaaran yahay waa in aanay noqon meel doqonigaratay ah si uu nacabku meelo badan weerarkeena uga fisho oo uu awoodda ciidankiisa u abla'ableeyo, ka dib marka ay colkiisu dhawr unug u qaybsamaan marba mid ayaynnu meel ku galaynaa oo inta aynnu mixdin ku ridno ku ridqaynaa.

17- Haddii aynnu ka dhabayno qorshahaas, cadowgu marka uu xoojiyo foolaadkiisa sayntiisa ayuu wiiqayaa, haddii uu sayntiisa xooojiyana foolaadkiisa ayuu wiiqayaa. Haddii uu garabkiisa midig xoojiyo garabkiisa bidix ayuu wiiqayaa, haddii uu bidixdiisa xoojiyana midigtiisa ayuu wiiqayaa. Haddii uu dhan kasta gurmad u dirana dhan kasta wuu ku wiiqmayaa. Sidaas ayaynnu gunta uga rujin karaynaa.

18- Tamar darrida colka dhanka tirada ka soo waajahda waxa ku kallifa in uu malaysto in meelo badan laga soo weerarayo, halka awoodda mugga lehna ay keensanayso in aad cadowga galinsiiso in uu malahaas hirgeliyo oo ciidankiisa kooxeeyo. Ka dibna aad ciidankaaga oo is haysta hurin yarba meel ku gasho oo hilfaha u qaaddo.

19- Ogaanshaha goobta iyo goorta uu dagaalka soo aaddani dhacayo waxa aynnu ka dheefaynaa in aynnu gulufkeenna u abla'ablayno kooxo si uu isaga oo keytoon (degdegaya) masaafooyin baaxad leh u jaro.

20- Balse haddii aanay goobta iyo goorta midina qeexnayn, garabka bidix ma xoojin karo garabka midig, garabka midigna ma xoojin karo ka bidix. Foolaadku kama hormari karo saynta, sayntuna uma gurman karto foolaadka, xataa haddii masaafada u dhexaysaa ay tahay dhawr boqol oo mitir.

21- Xataa haddii uu gulufka cadaawuhu geeshkeena ku labanlaabmayo, wax uu ina dheer yahay ma jirto mar haddii aanu garanayn goorta iyo goobta la isku gumaadayo, waxana aan odhan karaa guushaba markaas ayaa la gaadhi karaa.

22- In kasta oo uu cadaawuhu inaga ciidan iyo cudud badan yahay haddana dagaalka waynnu kaga gacan sarrayn karnaa. Keliya waxa aad kashiftaa qorshayaasha nacabka, ka dibna sidii aad is la qorshohoodaas ugaga guulaysan lahayd qorshee.

23- Daandaanso oo baqe gali cadawga, ka dibna u fiirso dhaqdhaqaaqiisa in uu soo mudho iyo in uu gabbaadkiisa ku sii jiro, kuna kallif in uu ka soo baxo dhufayska si aad u ogaato goldaloolooyinkiisa, bal in uu iska kaa caabiyayo oo la kulankaga u gubtahanyoonayo iyo in uu ku adkaysto

dhuumaalaysiga oo uu kaa warwareegayo. Sidaas ayaad ku kashifi karaysaa qorshayaasha nacabkaaga.

24- Si ka fiirsasho leh isu barbardhig karaanka guluufkaaga iyo awoodda geeshka cadaawaha, si aad u ogaato meelaha awooddoodu buuxdo ee laga maagayo iyo meelaha xooggii ciidanka tabanaya ee markiiba shafka lagu qaadan karayo.

25- Marka aad samaynayso taatikada carbinta iyo dhaqdhaqaaqa ciidannimo waxa kuu wanaagsan in aad labbahdo (qariso oo xeeladayso) qorshayaashaada kuu dejisan, sidaas ayaad kaga nabadgalaysaa indhaha basaasiinta iyo rugcaddaayada dabinnada iyo suuldaarooyinka[1] kuu dhigayaba.

26- Qaabka loo suuragaliyo in libinta laga dhex'allifo oo laga soo dhiraandhiriyo habdhaqanka iyo taatikada dhaqdhaqaaqa cadaawaha ruuxa keliya ee u dhuundaloola ee fahmi karayaa waa taliyaha uun!

27- Geeshka oo dhammi wuu arkayaa sida libinta looga dhabeeyay ee cadaawaha loo muquuniyay, balse askarina ma garanayo taxanaha taatikada iyo istiraatiijiyadda ah ee loo soo maray guushaas.

28- Ha ku celin oo mar danbe ha marin dhabbaha iyo hannaanka aad hore libinta ugu gaadhay ee u mar jidadka hadba sida ay keensato duruuftu. Ogow guushu waa guul

---

[1] Suuldaaro: Jallaafo. Marka qof soconaya addinka la hordhigo si uu u kufo. (Turjumaha)

uun, balse dhabbooyinku waxa ay u gedgeddoomaan hadba sida ay duruuftu saamaxdo.

29- Taatikada ciidannimadu waa sida biyaha, biyahana dabcigoodu waa in ay dulaha ka soo durduraan oo godannada ku ururaan.

30- Sidaa awgeed; hannaanka ugu toolmoon xilliga colaaddu waa in aad ka gaagaabsato goobaha xooggan oo aad ku gadooddo goobaha taagta yar, sida ay biyuhuba marka ay qulqulayaan uga leexleexdaan meelaha caabbiyaya ee ay dhabbooyinka sahlan u eegtaan.

31- Biyuhu waxa ay u qulqulaan oo gacammadooda u jeexdaan si waafaqsan oogada ay durdurayaan, askartuna waxa ay u diriraan oo guusha u raadceeyaan si waafaqsan taatikada ay cadaawaha ka arkaan.

32- Haddaba, sida aanay biyuhuba u yeelan qaabdhismeed joogto ah oo loogu soo hagaago ayaanu dagaalkuna u lahayn xaalado iyo duruufo cayiman oo lagaga talagalo.

33- Ninka doorin kara taatikooyinkiisa isaga oo ka shidaalqaadanaya habdhaqanka cadowgiisa, waxa lagu tibaaxi karaa in uu yahay taliye cirka laga soo hindhisay.

34- Shanta curiye ee Biyaha, Dabka, Xaabada, Macdanta iyo Dhulku, ma laha hannaan cayiman oo lagaga soo hagaago. Afarta xilli ee sannadka midiba mid ayuu beddelaa. Waxa jira xilli maalintu badan tahay iyo waqti uu habeenku baaxad leeyahay. Dayaxu marna waa maalinkaroon muggeed u buuxda, marna waa gudcur

magangooyo ah. Sidaa awgeed; ma jiraan wax dhan uun lagaga soo hagaagayaa ee wax waliba sida ay isu la gedgeddoomayaan uga dabagedgeddoon.

Cutubka 7aad: Carbinta gulufka

1- Xilliga colaadda waxa uu taliyaha sare amarrada toos uga qaataa suldaanka guud ee qaranka.
2- Ka dib waxa uu qalabeeyaa oo saadkooda iyo sahaydoodaba u dhammaystiraa geeshkiisa inta aanay xero-askareedda ka guurin ee dhaqaaq u hollan.
3- Ka dib waxa uu uga gudbayaa tallaabada ugu adag uguna rafaadka badan ee ah taatikada carbinta oo waxa uu ku dhibtoonayaa in uu wixii qalloocda oo dhan saxo, goldaloolooyinkana gufeeyo.
4- Si aad uga horgaadho cadaawaha goobta colaaddu ka aloosmayso waa in aad toobiyaysaa oo jid ay indhihiisu kaa soo gaadhayaan aadan ku walaacin, xataa haddii uu kaa hordhaqaaqo waa in aad uga horraysaa. Taasna waxa loogu kala dheereeyaa hadba sida loo kala xariifsan yahay.
5- Ciidan mug iyo miisaan leh haddii iyaga oo aan habaysnayn oo nin waliba kaalintii uu ku habboonaa aanu taagnayn aad carbis galiso, ogow; waxtarka uu ka helayo carbiskaas waxa ka badan waxyeellada uu kala huleelayo.

6- Haddii geeshkaaga oo si wanaagsan u qalabaysan aad u gaardisiiso dhanka goobta dagaalka waxa lagaa helayaa fursad ah in aad dibudhacdo oo goobta gacanta lagaaga dhigo. Dhan kale haddii aynnu iska taagno, si uu colkaagu hillaac biligtii masaafooyin baaxad leh u jaro waa in aad ka dhintaa booshashka iyo saadka ay sitaan ee miisaamaya.

7- Sidoo kale; haddii aad askartaada amarto in ay habeen iyo maalinba socdaan oo aanay meelna ku hakan si ay u jaraan masaafadii looga baahnaa labanlaabkeed iyaga oo sahaydoodii iyo jiscinkoodiina degta ku sita, ogow; in ay ciidankaagu cadawga u gacangelayaan oo la qafaalanayo taagdarrida iyo diifta soo gaadhaysa awgeed.

8- Ragga xooggan waa in aad ka dhigtaa foolaadka, kuwa nugul waa in aad ka dhigtaa saynta. Haddii aad tallaabadaas sideeda u raacdo %90 ciidankaagu wuu badbaadayaa.

9- Haddii aad gaardisiiso gulufkaaga 50 Km si aad u xeeladayso nacabkaaga waxa aad waayi doontaa hoggaamiyaha cutubka ugu horreeya ciidankaaga, colkaagana badh uun ayaa halkii loo gol lahaa gaadhaya.

10- Haddii aad gaardisiiso geeshkaaga 30 Km si aad u xeeladayso cadawgaaga, ciidankaaga saddexdalool laba ayaa goobta ka soo xaadiraya.

11- Waxa aynnu halkaa ka fahmaynaa in uu geeshku booshash la'aanta ku jabo, sahay iyo saad la'aanta ku jabo,

haddii aanu ilo door ah oo uu ka helayo quudka iyo gurmadkaba lahaynna uu jabo.

12- Cidna ha gaashaanbuuraysan adiga oo aan aqoon buuxda u yeelan qorshohooda iyo ujeedkooda.

13- Ciidankaagu gaardis iyo garmaamayn dhayal ugagama gudbi karo carrada aad mooggan tahay buureheeda iyo booraameheeda[1], kaymeheeda iyo bannaanadeeda, aagaggeeda qoyan iyo meeleheeda engegan, iyo sidoo kale dhulkeeda bahalogaleenka ah ee wadadabinka iyo jillaabta dedan ah iyo gabbaaddadeeda ammaanka lagu ledayo.

14- Deegaanka aad ku waajahan tahay haddii aadan u dhalan libin kama soo taabaysid, lug iyo laanina isu ma kaa gaadhayaan haddii aadan kaashan dhulyaqaan u dhashay aaggaas, nimaan dhul marinina dhaayo la'.

15- Marka aad dagaal ku jirto inta kuu qarsooni ha ka badato inta ku muuqata, sidaas ayaad libinta ku gaadhaysaa.

16- Haddii aad gulufkaaga abla'ablaynayso iyo haddii aad isku dhafayso oo hal waax is kaga dhigaysaba, waa in aad ka duushaa duruufaha colaadeed ee kugu gedaaman.

17- Waa in uu degdegsiinyahaagu noqdaa sida dabaysha, cufnaanta iyo is haysadka ciidankaaguna uu noqdaa sidii kayn jiq ah.

---

[1] Booraan: Bohol. Hogagga waaweyn. (Turjumaha)

18- Marka aad leeddafuulka[1] tahay iyo marka aad cadaawaha dhacayso ee hayntooda boobayso, u jiidh sida holaca dabka, una jilibdhig oo ha u digiigixan, hana u dhaqdhaqaaqin oo sida buurta u rundoodso.

19- Khiddadaha iyo qorshayaasha duullaankaagu waa in ay u dahsoonaadaan oo u qarsoonaadaan sida habeenka mugdigiisa, marka aad dhaqaaq maagtana waa in aad cadowgaaga ugu habsataa sida onkodka danabka leh.

20- Haddii aad waddan qabsato oo dhacdo, ku fasax ciidankaagu in ay qaniimada qaybsadaan, marka aad xuduud cusub qabsatana u astee gulufkaaga dhulgoosiyo yaryar oo ay wax ka beertaan.

21- Ka baaraandeg oo qaadaadhig oo dhan walba iska taag waayaha ku soo waajahaya ka hor inta aadan socod maagin oo ka fiirso inta aadan falin.

22- Jananka libinta ku geeraaraa waa ka yaqaanna xeeladda dibugurashada, taas ayaana la yidhaahdaa hannaanka carbinta.

23- Goobta dagaalka amarka lagu dhawaaqaa meel dheer ma gaadho ee waxa colka amarrada nin nin u gaadhsiiyaa waa durbaanka iyo dawanka baamboyda, amartilmaameedka gacmaha laga bixiyana geeshku si

---

[1] Leeddafuul: Marka faraska bilaa koore lagu fuulo si miisaanka looga yareeyo. (Turjumaha)

siman uma wadadheehdo ee waxa uu gulufku giddigii ka ilsugtaa waa calaamadaha lagu tibaaxo calamada.

24- Dawanka, durbaanka iyo calamadu waxa ay gaadhaan ili-ka-aragtay iyo dhegi-ka-maqashay iyaga oo si toos ah looga garanayo amarka gaarka ah ee ay tibaaxayaan.

25- Sidaas ayuu jananku ku samaynayaa ciidan weyne isku hal unug ah. Suuragal ma aha in uu geesi keligii goobta hore ugu dhaadhacaa ama uu fule keligii dib u gurtaa, taas ayaana la yidhaahdaa hindisaha unugaynta ciidanweynaha.

26- Habeendagaallanka amarrada ku bixi qoryaha holcaya iyo durbaannada, maalindagaallankana calamada, sidaas ayaad ku awoodaysaa in ay mar walba amarradu geeshka si siman u gaadhaan oo hannaankiinu aanu xagaldaac yeelan.

27- Laga yaabaa in colkaaga dhammaantii nafsadda laga dilo, abbaanduulahaagana garaadkiisa la gilgilo.

28- Ogow; askarta nafsaddoodu arooryadii ayay si mug leh u dhisan tahay, duhurkiina socodka way maagaan, fiidaddawgana waxa ay ku taamaan sidii ay xero-askareeddoodii ugu soo hoyan lahaayeen.

29- Sidaa awgeed; jananka xariifka ahi ma weeraro ciidanka nafsad ahaan u dhisan ee xamaasadaysan, waxa uuna bidhaansadaa oo baacsadaa colka niyaddu ka xumaato ee qoorta laalaadinaya, taas ayaa la yidhaahdaa hindisaha cabbiraadda niyadda.

30- Colkaaga habee oo hammigooda xasili. Sug inta aad cadaawaha ka helayso fursad. Ka dib marka uu isku dhexdaato ee bulaan ka yeedho ku habso oo intii uu dheefta kaaga heli lahaa labanlaabkeed ka halabso. Taas ayaa la yidhaahdaa hindisaha is adkaynta iyo hanashada nafta.

31- In aad uga dhowaato higsiga guusha inta uu cadaawuhu ka durugsan yahay, in aad goobta ugu sugto cadowga si deggenaan iyo nasasho leh inta uu isagu waayaha la soo hirdamayo, in aad ciidankaaga dhergiso inta ay kuwa nacabku gaajada la soo halgamayaan. Taas ayaa la yidhaahdaa hindisaha boobista karaanka nin kale.

32- Jidgooyo ha u gelin ciidan cutubyadiisu si ceebla' u nidaamsan yihiin. Ha weerarin ciidan ay ka muuqato xasillooni iyo kalsooni baaxad lihi. Waa sidaas hindisaha barashada duruufuhu.

33- Haddii uu dhulka dagaalku buuralay yahay cadawgaaga adiga oo buurta fananaya ha weerarin, haddii uu isagu dusha kaaga soo dhaadhacana ha horgoyn.

34- Ha caydhsan ciidan naflacaari la cararay, hana weerarin askar dhirifsan oo guubaabadii saamaysay.

35- Ha hungurayn callaafta ay cadaawuhu kuu tuurteen dalluun[1] ayaad ku shalwanaysaaye. Hana horjoogtayn ciidan ku sii jeeda dhulkiisii hooyo, daltabyada iyo

---

[1] Dalluun: Hog dheer oo dhuuban. (Turjumaha)

boholyowga haya ayaa ay ku la jiidhayaan oo shafka ayay kugu qaadanayaane.

36- Haddii aad ciidan go'doomiso u samee iliil yar oo ay ka yaacaan, hana ku kallifin in ay mintidaan oo uu dagaalkoodu ama geeri aakhiro ama guusha nololeed noqdo, ka dibna ay inta gaadhaysa iyaga ka badan kuu geystaan adiga.

37- Waa sidaas hindisaha dagaalku!

Cutubka 8^{aad}: Midabaynta taatikada dagaalka

1- Jananka dagaalyahanka ahi waxa uu amarrada toos uga qaataa suldaanka guud ee qaranka. Ka dib ciidanka ayuu dardargaliyaa oo u qalqaaliyaa in ay socdaalka bilaabaan.
2- Haddii uu deegaanku wanqar badan yahay ciidankaaga ha ku habeendhixin. Aagagga ay waddooyinku isku jaraan waa in aad ku lahaataa gaashaanbuur. Ha ku daahin sii jòogitaanka goobaha geerigo'anka ah waa halis'e. Haddii lagu hareereeyo oo aad go'doon gasho waa in aad xeelad miciinsataa. Haddii ay arrintu quus ku la gaadhana waa in aad si mintidis ah u dagaallantaa.
3- Waxa jira waddooyin laga inaabsay ah oo aanay habboonayn in aad raacdaa, ciidammo laga maago oo aanay ahayn in aad weerartaa, magaalooyin rag iyo rakooyin adag leh oo aanay wanaagsanayn in aad go'doomisaa iyo amarro ka soo fulaya suldaanka sare oo aanay habboonayn in aad fulisaa.
4- Jananka ka dheregsan waxtarka midabaynta xeeladaha iyo taatikooyinka colaaddu, sida ugu wanaagsan ee uu libinta ugu geeraari lahaa ayuu u hawlgeliyaa geeshkiisa.
5- Jananka aan ka dheregsanayn waxtarkaasi wuu yaqaannaa kala sarraynta deegaanka uu ka hawlgalayo,

balse waxa ka daahan sidii uu aqoontiisaas fal la dheehdo oo laga waxtaransado uga dhalin lahaa.

6- Ardayga dagaalbaradka ah ee rugcaddaanimada hindisaha dagaalka ee u beddelida qorshayaasha hadba sida ay duruuftu u geddoonto aan gaadhini, xataa haddii uu ka dheregsan yahay shanta faa'ido ee ay xeeladdaasi leedahay, u ma adeegsan karo askartiisa sida ugu habboon, uguna toolmoon.

7- Haddaba; jananka murtida ciidannimo ku talax tegay waxa uu qorshayaashiisa ku ladhaa waxtarka iyo waxyeellada midabaynta taatikada dagaalka.

8- Haddii saadaasha aynnu ka qabno waxtarka xeeladdaas aynnu weynayno laga yaabaa in aynnu ku guulaysanno dhammaystirka qaybta ugu tunka weyn khiddadeenaa.

9- Dhan kale haddii aynnu iska taagno; haddii aynnu isu diyaarinno in aynnu ka faa'idaysanno furasad cadaawaha i nooga muuqatay ugu horrayn waa in aynnu ka digtoonaanaa in aynnu innagu booraan hadimo ku hoobanno.

10- Dhin tirada iyo tayada hoggaamiyayaasha cadawga adiga oo dhexdooda iska hor'imaad ka unkaya. Dhibaabe ka dhex'aloos si ay iyagu isugu fiirsadaan oo adiga kaaga jeestaan, kuna ilaalee in ay mashquulkoodaas joogto ku ahaadaan. Inta aad shabag jillaabeed oo aanay iska hayn karayn u tuurato booraan hadimo uga hoosqod, si ay

dhan walba uga soo kudaan, ka dibna fartii ay taagaanba jabi.

11- Waxa uu hindisaha dagaalku ina barayaa in aynaan ku tiirsan malaha sheegaya in aanu nacabku ina soo weerarayn ee aynnu si tifatiran isugu diyaarinno la kulankiisa, isu diyaarintaasna aynaan ku tibaaxin in aynnu ka feejigan nahay weerarka shisheeyaha ee aynnu ku qeexno in aynnu saldhigyada collaalkeenna ka dhignay kuwo aan lagu soo dhiirran karayn.

12- Waxa jira shan arriimood oo halis ah oo saameeya jananka:

1) Taxaddar la'aanta oo dhalisa burburka colka. Haddii aad dagaalka islaweyni iyo gammaaragurdayn[1] ku gasho adiga oo aan qiimayn filashada guusha iyo jabka, adiga ayaa diracyadii gulufkaaga gawraca u bandhigay.
2) Fulaynimada oo dhalisa in geeshka la gumaado. In aad ka maagto ka faa'idaysiga fursadaha cadaawaha kaaga muuqda, in aad ka waabato waajihidda wanqaraha, in aad ku dedaasho in aad dagaalka nolol kaga soo baxdo iyo in aadan isu diyaarin halisaha kaa hor imanayaa waxa ay baaba' iyo kadeed u horseedaan gulufkaaga.
3) Dabci kakanaanta iyo seeflaboodnimada oo uu cadawgu kaaga faa'idaysanayo in uu dacaayad iyo

---

[1] Gammaaragurdayn: Orodka afarta waaxoodba uu qofku ku ordo ee badanka carruurta lagu cabsiiyo. (Turjumaha)

canbaarayn kaa cadhaysiinaysa degganaantaada ku duudsiyo, dabadeed aad dawga san ka weecato illeen waayeel xanaaqay xil ma garto'e.

4) Sharaf-dhawrashada. In aad libin raadinta aad dagaalka u gashay ka hormariso dhawrista sharaftaada fursado badan ayaa kaga hallaabaya colkaaga, cadowguna wuu kugu wiirsanayaa[1].

5) Ciidan-dhawrista. In aad dhawrato askartaada oo aadan miidaamini waxa ay geed dheer ku laashaa libinta, colkaaguna habayacsanaanta iyo dhaqaaqjoogsiga ayuu la qabsanayaa, in uu si sharaf iyo geesinimo leh dagaalka ugu dhintana waxa u beddelaysa in uu qafaalasho iyo maxbuusnimo ku dhinto.

13- Shantaas arrimood waxa ay koobsadaan gefafka jananka ciidammada, waxa ayna curyaamiyaan habsami'usocodka iyo hannaanka maaraynta dagaalka.

14- Haddii uu col dagaal ku jabo, janankoodana la loogo, waa hubaal in shantaa qodob mid ka mid ahi uu sababay hooggaas iyo halaaggaas ee waa in aad shantaa arrimood si waayeelnimo iyo ka baaraandeg leh uga arrinsataa.

---

[1] Wiirsi: Cid waxyeello soo gaadhay marka aad ku cariigsato adiga oo muujinaya in aad ku faraxsan tahay waxa helay. (Turjumaha)

Cutubka 9aad:Carbinta iyo dagaalgelinta colka

1- Hadda waxa aynnu u imanaynaa hannaanka iyo habka xero-askareedda loo yagleelo, dhaqdhaqaaqa cadaawahana isha loogu hayo. Buuraha si dhakhso ah ku dhaaf, ciidankana saldhiggiisa ka ballaysin meel il biyood leh (balli, haro, webi, il ama ceel).

2- Xeryaha geeshka ka binee meelaha sarsare ee ay cadceeddu diirinayso ee u bandhigan qorraxda, cadow kaa korreeyana ha ku duulin adiga oo taago fananaya, sidaas ayaa loo xeeladeeyaa dagaallad buuraha.

3- Haddii aad ka tallawdo webi kaabigiisa ha ku dagaallamin ee ka durug coonkiisa.

4- Kolka uu nacabku ka soo tallaabayo webiga, judhiiba ha ka horboodin oo ha weerarin ee sug inta uu ku kala badhmayo webiga, ka dibna marka meel uu ka noqdo aanu joogin si raynrayn leh u gumaad inta uu badhka kale soo gudbayo.

5- Haddii aad dirirta ka walaacsan tahay ha weerarin colka cadaawuhu isaga oo is la webigii uu ka soo tallaabay qawgiisa jooga, gadood ayuu kugu jiidhayaaye.

6- Mar kasta ka xeelad badi cadaawaha, ciidankaagana goob diirran oo cadceedda u banyaalla deji, hana raacin

qulqulka webiga adiga oo weerartamaya cadawga iyo biyaha ayaa isu kaa celinaya, col kaa badan iyo biyo kaa badanina way ku hafiyaan. Sidaas ayaa loo xeeladeeyaa hannaanka ku dagaallanka webiyda.

7- Haddii aad ka tallaabayso aag dhooqo ah hillaac biligtii ku haad, si aanu u saamayn gondaha raggaaga iyo qanjaafulaha (qoobabka) fardahaaga oo aanu holhol[1] ugu dhalin, hana dhayalsan dhiiqadaas.

8- Haddii lagugu kallifo in aad ku dagaallanto ban dhiiqo ah, waa in aad ka ag dhowaataa biyaha iyo cawslayda, dhabarkaagana aad ku tiirisaa meel dhir cufan leh. Sidaas ayaa loo galaa dagaallada bananka dhoobalayda ah.

9- Haddii uu dagaalku kugu qabsado deegaan qallalan eego taago aad korto oo dhabarka saarto si ay halista cadaawuhu dhanka hore uun kaaga ekaato, gadaashaaduna ay ammaan u ahaato. Sidaas ayaa loo galaa dagaalladaa degaanada engegan.

10- Afartaas hannaan waa waaxaha ugu mudan aqoonta iyo taatikada gulufka, iyaga ayaana u suuragalinaya suldaanka adeegsadaa in uu afar saldanadood oo kale gacanta ku dhigo.

---

[1] Holhol: Marka roobku xerada dhiriq ka dhigo, dhulkana dhiiqo ee ay xoolaha raafaha ka galaan dhiriqdaas iyo dhiiqadaasi, xanuunkana ku dhaliyaan ee ay xooluhu dhitiyaan ayaa la yidhaahdaa holhol ayaa galay, ilaa laga soo qufana sidaas ayay u dhitiyaan. (Turjumaha)

Cutubka 9aad:Carbinta iyo dagaalgelinta colka

1- Hadda waxa aynnu u imanaynaa hannaanka iyo habka xero-askareedda loo yagleelo, dhaqdhaqaaqa cadaawahana isha loogu hayo. Buuraha si dhakhso ah ku dhaaf, ciidankana saldhiggiisa ka ballaysin meel il biyood leh (balli, haro, webi, il ama ceel).

2- Xeryaha geeshka ka binee meelaha sarsare ee ay cadceeddu diirinayso ee u bandhigan qorraxda, cadow kaa korreeyana ha ku duulin adiga oo taago fananaya, sidaas ayaa loo xeeladeeyaa dagaallad buuraha.

3- Haddii aad ka tallawdo webi kaabigiisa ha ku dagaallamin ee ka durug coonkiisa.

4- Kolka uu nacabku ka soo tallaabayo webiga, judhiiba ha ka horboodin oo ha weerarin ee sug inta uu ku kala badhmayo webiga, ka dibna marka meel uu ka noqdo aanu joogin si raynrayn leh u gumaad inta uu badhka kale soo gudbayo.

5- Haddii aad dirirta ka walaacsan tahay ha weerarin colka cadaawuhu isaga oo is la webigii uu ka soo tallaabay qawgiisa jooga, gadood ayuu kugu jiidhayaaye.

6- Mar kasta ka xeelad badi cadaawaha, ciidankaagana goob diirran oo cadceedda u banyaalla deji, hana raacin

qulqulka webiga adiga oo weerartamaya cadawga iyo biyaha ayaa isu kaa celinaya, col kaa badan iyo biyo kaa badanina way ku hafiyaan. Sidaas ayaa loo xeeladeeyaa hannaanka ku dagaallanka webiyda.

7- Haddii aad ka tallaabayso aag dhooqo ah hillaac biligtii ku haad, si aanu u saamayn gondaha raggaaga iyo qanjaafulaha (qoobabka) fardahaaga oo aanu holhol[1] ugu dhalin, hana dhayalsan dhiiqadaas.

8- Haddii lagugu kallifo in aad ku dagaallanto ban dhiiqo ah, waa in aad ka ag dhowaataa biyaha iyo cawslayda, dhabarkaagana aad ku tiirisaa meel dhir cufan leh. Sidaas ayaa loo galaa dagaallada bananka dhoobalayda ah.

9- Haddii uu dagaalku kugu qabsado deegaan qallalan eego taago aad korto oo dhabarka saarto si ay halista cadaawuhu dhanka hore uun kaaga ekaato, gadaashaaduna ay ammaan u ahaato. Sidaas ayaa loo galaa dagaalladaa degaanada engegan.

10- Afartaas hannaan waa waaxaha ugu mudan aqoonta iyo taatikada gulufka, iyaga ayaana u suuragalinaya suldaanka adeegsadaa in uu afar saldanadood oo kale gacanta ku dhigo.

---

[1] Holhol: Marka roobku xerada dhiriq ka dhigo, dhulkana dhiiqo ee ay xoolaha raafaha ka galaan dhiriqdaas iyo dhiiqadaasi, xanuunkana ku dhaliyaan ee ay xooluhu dhitiyaan ayaa la yidhaahdaa holhol ayaa galay, ilaa laga soo qufana sidaas ayay u dhitiyaan. (Turjumaha)

11- Askarta oo dhammi dulaha ayay ka doorbidaan godannada, meelaha kaaha iyo diirranaanta lehna way ka jecel yihiin aagagga mugdiga iyo maagangooyada ah.
12- Haddii aad danayso duruufaha geeshkaaga oo aad dejiso xero cadceedda u bandhigan oo dul ku taalla, biyaha iyo beeraha quudkuna ka ag dhow yihiin, gurmadkuna uu ka soo gaadhi karo, waxa uu ka bedqabayaa cudurro badan oo nafsad ahaan iyo caafimaad ahaanba u saamayn lahaa, guushana sidaas ayuu ku soo gacangelinayaa.
13- Haddii aad timaaddo taago, qabso oo deg dhinaca qorraxdu hayso, dhanka gadaalena janjeedh hoobad dheeri ha kaa xigo, sidaas ayaad ku midaynaysaa awoodda ciidanka iyo anfaca deegaanka oo aad libinta ku hantiyaysaa.
14- Haddii aad damacdo in aad ka tallawdo webi mahiigaan iyo gudgude isaga danbeeyeen oo inta uu fatahay xunbaynaya iska jir oo ha ku fududaan, sugna inta uu kala degayo.
15- Deegaanka leh janjeedhka hoobadka ah ee uu daadku qulqulayo ciriqyada hoose ee aasan, durdurrada dusha ka dedan, kaymaha isku cufan, dhusinnada iyo dalluumaha, waa in aad ku dhaaftaa xawaaraha ugu sarreeya ee aad jari karto, geeshkaagana ha ka ag dhowayn.
16- Marka aynnu ka caagno aagagga noocaas ah cadaawaha oo mooggan ayaa gondaha la gelaya, kolkaas

ayaynnu innaga iyo deegaankaasi nacabka isu celinaynaa oo madixiisa minjo u rogaynaa.

17- Haddii uu xerada gulufkaaga ku teedsan yahay deegaan leh taagag badan, biyo fadhiisinno ay ku xeeran yihiin caws iyo cayo[1], dhusinno iyo godanno hoose oo cayo dabo iyo dacal is haysato ama kayn jirridaha dhirteedu aad isugu baxeen oo isugu marmeen... si taxaddar leh ayay nacabku u raadgadanayaan oo iyaga oo iska dhawraya dabinnada ayay goobta ka baxayaan, aagaggaasina waa dhufaysyada ay ku gabbadaan gaadaha gudoodiga ah iyo basaaska ilbareerku'eegga ahi.

18- Haddii uu cadowgu inoo soo dhowaado oo uu degganaantiisa iyo xasilloonidiisa dhawrto, ogow; waxa uu si ka fiirsasho leh isu la falgelinayaa awoodda colkiisa iyo anfaca booskiisa, si uu dhan walba kaaga taag roonaado.

19- Haddii aad aragto cadaawaha oo ka dhawrsanaya in uu u soo dhaadhaco goobta colaadda, haddana daandaansi iyo danqaabid wada, ogow; dagaalka ayuu ka labalabaynayaa oo ka walaacsan yahay'e.

20- Haddii xerada colka cadaawaha si fudud lagu gaadhi karo, ogow; in aanay kammiin la'ayn oo ay meel walba dabinno ku teedeen, si aad ugu dhacdidna jillaabo ayay kuu tuuranayaan.

---

[1] Cayo: Dhirta yaryar ee roobka la baxda ee markiiba qallasha. (Turjumaha)

21- Dhaqdhaqaaqa dhirta shoorku waxa ay ku tusinaysaa in uu nacabkii soo hormarayo, haddii aad raadad ku dhex'aragto cawslayda kaa ag dhowna waxa uu damacsan yahay in uu ku tuhun galiyo si kudhacaaga labalabayni u gasho.

22- Haddii aad daalacato baalallay duulduulaysa iyo shimbiro bulaamaya iska jir meeshaas kammiin ayaa ku jira'e, haddii aad aragto dugaag rooraya iyo ugaadh didsanna, ogow; weerar kedis ah oo leeddafuul ah ayaa kugu soo abbaaran'e.

23- Haddii ay siigo kacdo kor u fiddo oo boodh sare u takhlan aad aragtid, ogoow; gaadiid dagaal ayaa kugu soo aaddan'e. Haddii uu boodhku hoos u baaho oo is ballaadhiyo ogoow; afantari ayaa soo lugaynayee. Haddii ay fidhadu laba waaxood u kala baxdo ogow; in cadaawuhu cutubyo u dirsaday xaabo iyo haamo biyo ah. Haddii uu boodhku unug unug u baaho oo habdhis daruureed unko, ogoow; in uu yoolka gulufku yahay yagleelidda xero ciidan.

24- Odhaahaha habayacsanaanta leh iyo guulguulidda is diyaarintu ku ladhan tahay ee nacabku waxa ay soo waddaa weerar. Erayada gaardiska iyo bulxanka ah iyo dhaqaaqjoogsiga ay hadba hore u soo siqayaanna waxa uu muujiyaa in ay dibugurasho doorbidayaan.

25- Kolka uu gaadiidka dagaal ee fudud soo hormariyo nacabku ee ay labada waaxood u kala qaybsamaan waxa ay muujisaa in ay qaabdhismeed dagaal unkayaan.
26- Kabaqaad[1] kasta iyo nabadgalyo doon kasta oo aanay dhaar iyo heshiis la kala saxeexdaa la socon oo laguu soo bandhigo, ogow; shirqool ayaa ay huwan tahay oo ku huursan'e.
27- Haddii aad mar uun aragto geesh kolka la is galo baqdin muujinaya oo fadalkooda[2] farduhu guga ka wabaxdareerayaan, kolka saami qaybsi ay noqotana derejooyinka kala riixriixanaya oo ninba nin ka ximinayo, ka samir colkaas!
28- Haddii aad dheehato gulufka cadaawaha oo darna soo hormarayaan, duulka kalen dib u guranayaan, ogow; jillaab ayaa laguu tuurtaye.
29- Kolka aad ka ilsugato geeshka cadaawaha oo tiirtiiriyay warmihii iyo eebooyinkii, gaajo ayaa ay la golongoleen oo quud ayaa ay u gadoodsan yihiin.
30- Haddii hurinta cadaawuhu darka iyo waraabka u soo dirtaan kolka ay biyaha dhugtaanba u horradaan oo halhaleel ku cabbaan, ogow; in uu colkaasi oon la

---

[1] Kabaqaad: Marka qolo colaad lagaga adkaado ee ay kabaha afka ku qaadaan. (qof kasta oo jecel in uu nabad helo, dullinimaba ha ku noolaado'e). (Turjumaha)
[2] Fadal: Marka farasku meesha uu ordo dhulka raafkiisu qodo ee godanka yar ka dhigo. (Turjumaha)

daalaadhacayo oo aanu iska kaa caabbiyi karayn haddii aad ku duusho.

31- Haddii ay cadaawuhu qaniimo kaa faramaroojistaan oo aanay ku dedaalin ilaashigeeda iyo in ay araggaaga ka dheereeyaan ogow; ciidankaasi wuu dhacsaalay oo taag, tahlid iyo tukur uu kaaga dhacsado haddii aad ku rogaalcelisaa kuma hadhana.

32- Haddii aad daalacato shimbiro goob ku urursan waxa ay ku tusinaysaa in meeshaasi cidla' ciirsila' ay tahay. Gurxanka iyo sawaxanka habeennimaduna waxa ay kuu muujinaysaa in uu colku isku dhexyaacsan yahay oo utini jirto.

33- Haddii ay xero-askareeddu khalkhalsan tahay oo nidaamkeedu liito taliskeeda ayaa jilicsan. Haddii si habaysan calammada la isugu gudbiyo oo la isu beddelo, ciidankaasi si tifatiran ayuu u abaabulan yahay. Haddii ay saraakiisha gulufku weeran yihiin oo cadho jiq la yihiin, ogow; in uu gulufkaasi daallan yahay.

34- Marka uu geeshku fardihiisa siiyo raashinkiisa, lo'diisana uu qasho ee quuto, askartuna aanay dheryeheedii dulsudhin dhardhaarradii dabka, waxa ay ku tusinaysaa in aanu gulufkaasi ku soo laabanayn xeradiisaas oo uu go'aansaday in uu guuro oo geeddi u xidhxidhan yahay ama uu goostay ama guusha nololeed ama geeri aakhiro oo ay duullaan mintid ah kugu soo wadaan.

35- Haddii ay colku u muuqdaan kuwo unug unug iyo hurin hurin afka isu saarsaaraya oo nuxnuxlayn iyo faq wada, ama ay si hoose u hawraartamayaan oo hoosta ka gurxamayaan ogow; waxa jira jidhdiid iyo caagganaan dhanka amarrada taliska iyo gelidda safka ah'e.

36- Mar kasta oo ay badato abaalmarinta colku ogow ilaha dhaqaale ee gulufkaasi way tirmayaan. Mar kasta oo badato ciqaabista geeshkuna ogow in ciidankaas taagdarradiisa iyo isku buuqsanaantiisu tarmayso.

37- Inta aadan duulin baallaxooftayn iyo cagajuglayn colka cadaawaha ku asqaysii, si aad laabohooda argagax aan ka tirmin aad ugu beertana tusi in aadan u jixinjixayn oo u digiigaxanayn haddii aad gacan ku dhigto, kolkaa in ay ku la diriraan waxa ay ka doorbidayaan in ay dabada jeediyaan oo cagaha wax ka dayaan.

38- Kolka ergada laguu soo diraa ay afkooda kugu ammaanaan ee kugu bogaadiyaan, ogow; in uu nacabkaagu nabaddaada u jeellan yahay oo uu taxdhigay.

39- Haddii uu gulufka cadaawuhu si cadho ku ladhan tahay u soo gaardiyo oo inta uu goobta ka soo xaadiro uu soona duuli waayo dibna u dooli waayo, waa in aad digtoonaataa oo feejignaataa timir laf ayaa ku jirta oo jab ayuu ku la maaggan yahay'e.

40- Haddii aanu geeshkeenu ka tiro badnayn ka cadaawaha, awood inagu filan iyo mid inaga badanba waynnu haysannaa, keliya waa in aynaan weerar toos ah

qaadin, waana in aynnu kulminnaa gulufkeenna oo unug keliya is kaga dhignaa, waana in aynnu joogtaynaa helitaanka wax kasta oo nafsadda iyo awoodda ciidankeenna xoojinaya.

41- Jananka ciidankiisa aadka u carbiyaa maaha in uu garasho dheer yahay ee keliya waxa uu muujinayaa karaankiisa ah in iskuday kasta oo lagu damacsan yahay in lagu qabsado uu ganafka ku dhufanayo.

42- Haddii aad askarta ciqaab iyo cagajuglayn ku bilawdo ka hor inta aanay bislaan ee garaadkoodu geeshnimada ku gaamurin, ogow; waligood ma amar qaadanayaan, kumana addeecayaan, askari aan amarka qaadanayninna waa garas maydhax ka diir. Haddiise gaamuristooda iyo addeecistooda dabadeed aad ciqaabi waydo ka gefa, wax ay tarayaan haba yaraato'e ma jirto!

Cutubka10^{aad} : Ka la sarraynta dhulka.

1- Waxa aynnu u abla'ablaynaynaa kala sarraynta dhulka lix waaxood oo kala ah:

1) Degaan waafi ah.
2) Degaan kakan.
3) Degaan qaxar[1] ah.
4) Degaan cidhiidhyoon.
5) Degaan hoobaddo halis ah leh.
6) Degaan cadaawaha aad uga durugsan.

2- Degaanka dhan walba loo gooshi karo ee aan gaango'[2] dhusin ah iyo gumburo[3] midna lahayn, ayaa loo yaqaanaa degaan waafi ah.

3- Degaanka dabeecaddan leh waa in aad cadaawaha ka horqabsataa, waliba aagagga sarsare ee diirran, sida wanaagsanna wax looga daalacan karo, kuna dedaal ilaashiga dhabbooyinka gurmadkaaga. Haddii aad intaa fuliso waxa aad dagaallamaysaa adiga oo libintu geed kuu saaran tahay.

---

[1] Qaxar: Dhib badan. (Turjumaha)

[2] Gaango': Marka dhulka biyaha roobku jeexaan ee dalooliyaan ama barkadaha marka ay hareeraha biyuhu ka gooyaan. (Turjumaha)

[3] Gumburo: Rabaallo. Kuro. Taagooyin. (Turjumaha)

4- Degaanka haddii sandulle lagaaga dhigo aad dib uga guran karto, balse in aad mar labaad qabsataa ay adag tahay ayaa loo yaqaannaa degaan kakan.

5- Dhulka qaabkan ah haddii aanu cadowgu diyaarsanayn oo imaanshahaaga malaysanayn, weerar kedis ah ayaad galaabixin kartaa oo waad jabin kartaa. Balse haddii uu nacabku kaa il horreeyay oo imaanshahaaga filanayay, in aad hilfaha u qaaddaana aanay kuu suuroobin, dibugurashana ay ku la ahaan waydo, aafo ayaad ka dhaxlaysaa.

6- Degaanka aanay labada quwadood ee ku loollamaya midkoodna qabsan karin, tallaabana hore u soo qaadi karin ee uu mid waliba dhankiisa ka labalabaynayo, ayaa loo yaqaannaa degaan qaxar ah.

7- Degaanka dabcigan leh si aanay cadaawuhu jillaab i noogu dagin oo baqe carar i noogu muujin, si aynnu goobteena uga soo hormarno oo ay i noo gumaadaan, waxa habboon in aynaan colkeenna qayb qaybin ee aynnu dibugurasho iyo baqe carar muujinno innaga oo nacabka dagayna, kolka uu foolaadkiisu soo hinqadana aynnu weerar ku rogaalcelinno oo innaga oo libinta isku hubna aynnu cidhibtirno.

8- Marka aynnu ka hadlayno deegaanka cidhiidhyoon ee dhabbooyinka luuqyada ah leh, haddii aad horraan qabsato dhufaysyadeeda dhidib oo si dhiirranaan leh u dhawr imaanshaha nacabka, kolka ay soo galaanna weerar

kedis ah ayaynnu ku bilaabaynaa oo mudankooda ayaynnu marsiinaynaa.

9- In kastaba ha le'ekaato awoodda nacabka marinka cidhiidhyoon gacanta ku dhigay'e, haddii uu si dhammaystiran dhufaysyadiisa u dhidbay oo ilaalo xooggan dhigay ha ka dabategin. Haddiise ay ilaaladiisu liidato dhexjibaax oo xoog ku jiidh.

10- Kolka aynnu gorfaynayno hoobaddada halista ah, haddii aad ka horumarto liddigaaga waa in aad hanataa goobaha sarsare ee diirran, ka dibna aad u dooyaysataa[1] oo sugtaa imaanshaha cadaawaha.

11- Haddii uu nacabku kaa horqabsado dulaha sarsare ha ka dabafanan ee dibugurasho samee oo tusi in aad goobta ka baxayso si uu kaaga soo dabaqamaamo oo aad u sinnaataan.

12- Haddii aad liddigaaga aad uga durugsan tahay, labada colna isku awood iyo itaal ay yihiin, ha daandaansan hana weerarin, isaga oo awooddiisii oo dhan kugu sugaya ayuu colkaaga oo daalay gaadhayaa oo uu afka u dhiganayaa, taasna dani kuugu ma jirto'e.

13- Lixdaas mabda' ayaa colka iyo dhulka mideeya, jananka hoggaaminta hanaqaadka ku ahina waa in uu si ebyan u ogaadaa uguna hawlgalaa. (Lixdan qodob laga

---

[1] Dooyaysi: Digrinxidhasho. Marka odayaashu go'a jilbaha ku xidhaan ee tiirsimo ka dhigtaan. (Turjumaha)

yaabaa in aanay saamayntaas uu ku tibaaxay habdagaallanka waayadan sida uu u dhigay aanay u saamayn).

14- Geeshka waxa jab iyo halaag u horseeda lix arrin, lixdaasna dabeecaddu kuma lug laha ee waa gefafka taliska geeshka, isaga ayaana hooggaas tuurta u ridanaya, waana:

1) Firdhadka.
2) Amardiiddada.
3) Nafsadjabka.
4) Hallaysnaanta.
5) Abaabul xumada.
6) Jabka.

15- Haddii xaaladaha kale oo dhan laga siman yahay, balse ciidan lagu gano oo gundhada loo dhigo col ka baaxad weyn oo ku soo toban laabmaya, geeshkaas haantaa hadhuubla' ayaa ku dhacda oo wuu kala firdhanayaa.

16- Haddii ay askartu jidh ahaan iyo nafsad ahaanba u xooggan yihiin, balse ay sarkaalladu liitaan amardiiddo ayaa timaadda, haddii ay sarkaalladu xooggan yihiin balse ay askartu taagdaran yihiinna, nafsadjab ayaa yimaadda.

17- Marka ay dhirifsan yihiin sarkaallada darajooyinka sarsare ee ay amardiiddada sameeyaan ama aanay sugin amarka taliska sare ee ay aashood dagaal galaan, kolka jibaadka ragga, jaanta faraska iyo jabaqda warmaha la kala saari waayo ee uu sarkaal kastaa u dagaallamo hadba sida

ay ula muuqato, geeshkaasi hallaysnaan ayuu ka dhaxlaa oo birta ayaa laga aslaa.

18- Haddii uu jananku yahay ku taagdaran oo bilaa amar iyo go'aan ah, amarradiisuna ay kakan yihiin oo isku murugsan yihiin, haddii aanay jirin waajibaaddo xaddidan oo u kala qorshaysan sarkaallada iyo askarta, derejooyinkana loo qaybsado si habayacsanaan iyo sedbursi ah, waxa laga dhaxlaa abaabul xumo dumisa hannaanka taliska colka.

19- Haddii uu jananku cabbiri kari waayo awoodda iyo itaalka liddigiisa, colkiisa oo halhaleel u rooraya ayuu ciidan ka awood weyn gundhada u dhigaa, ama hurin taagdaran ayuu col ka tamar roon ku la itaalsadaa, taasna waxa laga la huleelaa jab. (mar kasta oo aad ragga dardaran dhigto safafka hore ee geeshka, gulufkaagana niyadda ayaa u dhismaysa ka cadaawuhuna wuu quusanayaa).

20- Lixdaas hab ayuu ku yimaaddaa jab oo colka galinsiiya dab, janankuna waa in uu lahaadaa tab uu ugu abuuro ciidankiisa qab, si aanay u noqonin sab, niyadoodunna u ahaato lab.

21- Nidaamka suubban ee dawladdu waa gaashaanbuurta ugu sidata ee askarta, balse karaanka qiyaasidda quwadda liddiga, maaraynta ilaha iyo sababaha libinta iyo ka-baaraandegga duruufaha adadag, wanqaraha iyo baaxadda arladu, waa qodobbada lagu shirrabo itaalka jananka gulufka gadhwadeenka ka ah.

22- Jananka qodobbadaas ka dheregsan ee sida ay yihiin u fuliya xilliga colaaddu waa hubaal in uu libinta ku geeraarayo. Jananka se bawsaday[1], xilliga dirirtana aan garab iyo gaashaanba ka dhigan qodobbadaasi, waa hubaal in uu farta dhexda ka qaniini doono oo jabba jab ku simi doono.

23- Haddii ay guushu geed kuu saaran tahay oo aad hubto in aad libin kala galab carraabayso waa in aad dagaallantaa xataa haddii uu boqorku kaa hor'istaago. Haddii se uu goobtaa jab ka soo higil madow yahay, waa in aad ka gaagaabsataa xataa haddii uu boqorku go'aansado dirir.

24- Jananka dagaalka u hinqada isaga oo aanu ujeedkiisu ahayn magac iyo maamuus doon, dirirtana dib uga gurta isaga oo aanay dantiisu ahayn ka carar uu ka roorayo xan iyo ceeb, jananka uu yoolkiisu yahay ilaashiga waddankiisa iyo u adeegista boqorku, waa johoradda boqortooyada.

25- U la dhaqan askartaada sida awlaaddaada, dhusinka haddii aad ku libidho way kaa soo dabadhunbanayaan'e. Kuna eeg il gacaltooyo iyo waalidnimo, inta uu jidhkoodu dubaaxinayo way kaa garab dagaallamayaan'e. (la cun, la cab, la seexo, degta inta ay ku qaadaan dhiggeeda ku qaad, dharkooda mid la mid ah xidho, gaadiidka ay saaran yihiin mid la mid ah fuul...).

---

[1] Bawsi: Arrin marka aad bilawga ku tahay ee aadan aqoon badan u lahayn. (Turjumaha)

26- Haddii aad tahay janan debecsan oo dhanka san wax ka eega, balse aadan karin in aad awooddaada dareensiiso colkaaga... haddii aad niyadsan tahay balse aadan tahlin meelmarinta amarradaada... haddii aadan awoodin is hortaagga iyo daminta nidaam darrada iyo qulqulataynta colka, ciidankaagu waxa ay noqonayaan kuwo hallaysan oo aan ku dar iyo ka daa midna lahayn. Sidoo kale; haddii ay colkaagu adiga kaa haybadaystaan, cadaawaha kama dhawrsadaan.

27- Haddii aynnu war iyo wacaal ku hayno in gulufkeennu weerar u weeran yahay, geeshka nacabkuna iska weerista u weeran yahay, wadiiqadii guusha kala badh ayaynnu hantinay.

28- Haddii aynnu dooc iyo dareen ka qabno in uu liddigeennu duullaan soo yahay. Sidoo kale; aynaan garanayn in halyeeyadeennuna aanay u diyaarsanayn danbaabudhayntiisa[1], dariiqii guusha kala badh ayaynnu hantinay.

29- Haddii aynnu ogaanno in uu nacabku duullaan inagu soo yahay, askarteenuna ay weerar u abaabulan yihiin, balse aynaan hubin kala sarraynta goobta dagaalka iyo dabciga deegaanka, wali dhabbihii guusha kala badh ayaynnu gacanta ku haysannaa.

---

[1] Danbaabudho: Qaabka ay gammaaanku u dagaallamaan ee harraatida ah, waliba marka labada lugood ay ku wadadhuftaan. (Turjumaha)

30- Innaga oo qodobbadaas ka shidaal qaadanayna, jananka khibradda iyo taatikada ciidannimo ka dheregsani waxa uu dhaqaaq u holladaa isaga oo aanay werwer, walbahaar, dhabannahays iyo dhakafaar toona haysan. Kolka uu xero ciidan yagleelayana isaga oo aanay hantiyi ka hallaysmin, askarina ka afqudhmin ayuu dhidbaa, waayo; duruuf waliba inta aanay is gole keenin ayuu lafaguraa oo rogrogaa, kolka ay timaaddana gaawe[1] uu u cushay ayuu ku ibo lisaa.

31- Sidaas awgeed; waxa aynnu ku soo afmeeraynaa: haddii aad karaankaaga ogaato awoodda cadawgana garato guushaadu geed ayaa ay kuu saaran tahay. Haddii aad kala sarraynta degaanka iyo hannaanka cimilada aqoon buuxda u leedahayna, libintaadu way dhammaystirmaysaa.

[1] Gaawe: Hadhuubgaalka weyn ee geela lagu liso. (Turjumaha)

Cutubka 11aad: Sagaalka Goobood Ee Colaadda

1- Hindisaha dagaalku waxa uu tibaaxayaa sagaal hannaan oo loo abla'ableeyo goobta la isku haleelayo:

1) Goob faylfaylan.
2) Goob jimcoon.
3) Goob kadeed ah.
4) Goob furan.
5) Goob is goys ah.
6) Goob wanqar ah.
7) Goob kakan.
8) Goob xayndaaban.
9) Goob magangooyo ah.

2- Kolka uu jananku ku dagaallamayo degaankiisa ayaa la yidhaahdaa goob faylfaylan, oo askartu waxa ay dhaaddan yihiin in ay dhulkoodii joogaan, waxana ay u xiiso qabaan ubadkoodii iyo ooryahoodii. Sidaa awgeed; waxa ay gaadayaan fursad ay helaan oo inta ay kala filqaan ay iyaga oo faylfaylan oo in yar in yar u kala socda sida koronkorrada[1] dhan walba ugu firdhadaan oo dagaalka sidaas kaga baxsadaanba.

3- Marka uu jananku u dhaadhaco xuduudka cadaawaha ee xoogaa yar uu gudaha u galo ayaa la yidhaahdaa goob

[1] Koronkorro: Ugxanta ayaxu marka ay dillaacdo. (Turjumaha)

jimcoon. Goobtaasna waxa uu ugu dagaallamaa si haddii sandulle lagaga dhigo dibugurasho ay ugu fududaato.

4- Degaanka qabsashadiisu ay labada colba waxtarka u leedahay ayaa ah goob kadeed ah. Waa degaanka ay isku difaaci karaan hurimaha iyo unugyada taagta daran ee tirada yari ee waliba colka miisaanka leh lagu jabin karo, sida wadiiqooyinka cidhiidhyoon iwm.

5- Degaanka ay labada colba sidii ay rabaan u gaafwareegi karaan ee ay isku xidhaan jidadka is goynaya ee dhan walba isu dhaafdhaafaya ayaa ah degaan furan.

6- Degaanka kala sooca saddex dal oo deris ah ee ay soohdimohoodu isku jaraan ee hadba qolada qabsata ay labada kale u hoganayaan iyo degaanka ay dhabbooyinka badani isku waydaartaan ayaa loo yaqaannaa goob is goys ah.

7- Kolka uu ciidan u dhaadhaco gudaha dalka cadaawaha, magaalooyin dhufaysyo adadag oo aanu furanna uu dhaafo, colkaasi meesha uu dagaaba waa goob wanqar ah.

8- Buuraha, kaymaha, hoobaddada, biyafadhiisinnada, dhoobalayda, tammuuxda iyo aag kasta oo ka gudubkiisu uu qaxar iyo qato badan yahay ayaa loo yaqaanaa goob kakan.

9- Degaanka cidhiidhyoon ee nafkabaxa lagu gaadhayo, haddii lagu muquuniyana aadan dib uga guran karin ee halista miidhan ah, hurin cadawga ka mid ahina ay

colkeena garab dhan la degayso ayaa loo yaqaanaa goob xayndaaban.

10- Degaanka aynnu jabka kaga fakan karno keliya si mintidnimo leh oo aan dibudhigis lahayn in aynnu u dagaallanno ayaa la yidhaahdaa goob magangooyo ah.

11- Sidaa awgeed; goobta faylfaylan ha ku dagaallamin, goobta jimcoonna ha ku hakan, goobta kadeedka ahna ha ku weerartamin.

12- Goobta furan jidgooyo ha u dhigan cadaawaha, goobta is goyska ah gaashaanbuur ku samayso.

13- Goobta wanqarta ah dhaca iyo boobka ururso. (qodobkani waxa uu ka hor imanayaa xeerka ah: deegaanka aad ku dagaallamayso degganaanshiyihiisa hano oo soo dhowee si ay garabkaaga u noqdaan oo aanay fallaadh kugu ligan u noqon, haddii aad awoodi waydo se boob oo dhac). Goobta kakanna ku dedaal in ay geeshkaagu si wadajir ah gaardis ugu dhaafaan.

14- Goobta go'doonsan miciinso xeeladda taatikada ciidannimo ee aad cadaawaha is kaga weecin karto, goobta magangooyada ahna dagaallan, haddii aanay waddo aan dagaal ahayni jirin askari kastaaba wuu ka dhab sheegaa oo ama guusha aakhiro ama geeri nololeed ayuu u dagaallamaa, taasina waxa ay ka mid tahay sababaha ugu culculus ee guusha dhaliya.

15- Jananaka loo yaqaanno khabiirku, waa ka yaqaanna taatikada kala dhexhulluuqashada foolaadka iyo saynta

cadaawaha, isaga oo horjoogsanaya isu gurmadka waaxaha guutooyinka iyo hurimaha ah ee colka, isaga oo kammiin u dhiganaya cutubyada waaweyn ee u gurmanaya xoojinta unugyada yaryar ee faraha kulul lagu hayo, isaga oo ka hortagaya in ay sarkaallada cadaawuhu is la helaan firdhadka iyo filqanka geeshkooda oo inta ay uruuriyaan ay goobta ku soo rogaalceliyaan.

16- Haddii ay askarta cadaawuhu kulmisan yihiin oo hal unug la is kaga dhigay, jananka buuniga ahi waa ka gaadhsiiya heer ay is jidhdiidaan oo midiba ka kale iska eego isaga oo ibtilo ka dhex'aloosaya, bahdii diidna bahal baa leh.

17- Haddii ay dani ugu jirto jananka buuniga ahi waxa uu amraa geeshka in ay hore u gaardiyaan oo goobta iska xaadiriyaan, haddii aanay dani ugu jirinna colka wuu hakiyaa inta uu cadaawaha kala irdhaysiinayo.

18- Haddii aad i warsato: sidee loo maaraynayaa cadow kaa cudud iyo ciidan badan, safafkiisuna kaa abaabul roon yihiin, jiib iyo jaanna isku darsaday oo duullaankaaga diyaar u ah? waxa aan kuugu warcelinayaa: hano wax cadaawaha qiimo weyn la leh isaga ayaa kuu hoganaya oo gorodda kuu laalaadinaya'e.

19- Degdeggu waa johoradda dagaalka, kuna dedaal ka waxtaransiga is dhigashada cadaawaha, raac oo qaad jidad aan lagaa malaysanayn oo weerar goobaha ilaaladeedu liidato.

20- Waxa intaa soo raaca xeerarka ilaalaynta xoogga weerarka ah: mar kasta oo aad degaanka cadaawaha hore ugu fogaataa waa mar kasta oo is haysiga colkaagu uu adkaado. Sidaas awgeed; weerar celinta nacabku waxba kuma gaadhsiin karto.

21- Ku duul dal taag carro-san ah, si aad uga leddo quudka colkaaga.

22- Ifafaalee rarynraynta colkaaga, wax aanay tahlaynna tuurta ha u saarin. Xoogga saar dhawrashada tamartaada iyo dhitaysiga awooddaada. Geeshkaaga unug is haysta oo aan xeryo-guulka ku hakan ee habeenba habeenka ka danbeeya ka digo rogta ka dhig, si uu cadawgu ugu khalkhalo garashada rabitaankaaga oo hindis shaxo aan dhayal lagu kashifi karin.

23- Ku gan colkaaga aagag aan laga firdhan karayn geerida ayaa ay ka doorbidayaan cararka'e, haddii uu askarigu geerida u babbacdhigana wax walba wuu ka dhabayn karaa, kolka ay talo halkaa la maraysana sarkaallada iyo askartuba dedaal aan yarayn ayaa ay ku bixinayaan oo taag iyo tukur wixii ay hayeenba way gole keenayaan si ay ragga isaga dhiciyaan.

24- Haddii ay askartu quustaan cabsidu way ka tirantaa, haddii ay waayaan gabbaad ay u iishaan jilibka ayaa ay aastaan, haddii ay ka dagaallamayaan deegaanka cadaawaha foolaadkooda ayaa fool adayga, haddii aanay

badbaado rajaynayna taag iyo tukur wixii ay hayeenba way kulmiyaan oo si kamadanbays ah ayay u dagaallamaan.
25- Sidaa awgeed; askartu si joogto ah ayay u hawlgalayaan iyaga oo aan derejooyin rajaynayn, rabitaankaaga ayay fulinayaan iyaga oo aan kaa sugayn in aad warsato, iimaanka ayaa qanjaha joogsanaya iyaga oo aan xeerar dabraya loo dhigin, kalsoonidaada ayay ka dhabaynayaan iyaga oo aan amar kaa sugayn.
26- Ka ilaali gulufkaaga sixirka, xiddigiska iyo saadaasha khuraafaadka ah, cabsi ayay ku abuuraan ragga oo dhimashada horteed ayay boqol jeer dilaane, inta uu wadku sidiisa u imanayana waa in colka masiibooyinkaas laga jiraa.
27- Haddii aanay askartaadu danayn haynta (hantida), ha u malayn in ay hantiilenimada neceb yihiin. Haddii aanay noloshooda daryeelin, ha u malayn in aanay cimridhererka jeclayn. (Sun Tzu waxa uu doonayaa in uu u tibaaxo jananka in ay askartu dad yihiin oo rabitaankii Aadame oo dhan ay leeyihiin. Sidaa awgeed; uu ka jiro wixii ka mashquulinaya hannaanka dagaalka, kolka qaniimo la helana askari walba saami laga siiyo).
28- Maalinka aad askarta amarto dagaalka way ooyayaan oo ilmada indhaha ka dareerta ee dhabannada raacda ayaa

hugooda dhoshoq[1] ka dhigaysa (kama aha cabsi ee waxa ku adkaanaysa fulinta amarka). Balse kolka goobta la isku haleelo waxa ay muujinayaan geesinimadii Chu iyo Kuei[2].

29- Taatikayahanka xariifka ahi waa sida maska Shuai-Jan[3] ee jooga buuraha Ch'ang oo kale, haddii aad dibkiisa durto madixiisa ayaa kugu soo duulaya, haddii aad madixiisa weerartana dabada ayuu kugu weerayaa, haddii aad docaha ka abbaartana madaxa iyo dabadaba wuu isugu kaa keenayaa.

30- Haddii aad i toyato askartu ma ku dayan karaan maskaa Shuai-Jan? Waxa aan kuugu warcelinayaa: "haa!" ciidanka boqortooyada Wu iyo geeshka Yueh waa col daahii go'ay, balse haddii ay wabi kaga tallaabayaan hal huudhi oo ay baddu ku kacdo, sida midigta iyo bidixda ayaa ay isu kaashanayaan. (ka dhig foolaadka iyo saynta

---

[1] Dhoshoq: Qoyaanka aadka ah, sida marka marada la maydhayo oo kale. (Turjumaha)

[2] Chu: Waa geesi noolaa waayihii Sun Tzu oo loo xilsaaray shirqoolka boqorkii Wang Lee-ow, ka dibna mindi ku qarsaday kalluunkii uu boqorku ku cashaynayay oo ka takhalusay. (Wikipedia)

Kuei[na] boqortooyadiisii ayay saddex jeer mid kale jabisay, iyada oo ku siqaysa is dhiibis ayuu ninkani hulluuqday qasrigii boqortooyada oo inta uu wadnaha toorri ka saaray boqorkii ka saxeexay in uu waddankiisa ka baxo. (Wikipedia)

[3] Shuai-Jan: Waa eray Shiine ah oo macneeya socodka degdegga ah, maskaasna waxa loogu bixiyay waabasho la'aantiisa, imminkana waaba eray ay ciidanka ku carbiyaan. (Wikipedia)

colkaba kuwo si dhakhso ah weerarka uga warceliya, iyagana is kaga dhig hal unug oo isu damqanaya. Haddii collaalkaas cadaawaha ahiba ay is garabsadeen markii ay dantu badday ee ay halista wadadareemeen, maxaa u diidaya hal col waaxihiisa oo wax waliba ka dhexeeyaan in ay sidaas iyo si ka wanaagsanba isu garabsadaan).

31- Askarta orodka kama horjoogsado fardahooda oo aad dabartaa ama taayirrada gaadhi-faraska oo aad dhaabtaa. (hababkan ayaa xilligaa Sun Tzu askartu goobta in ay ka fakadaan lagaga ilaalin jiray, waxa uuna uga jeedaa colka waxa cararka ka caabbiya is jeclaanta iyo isu damqashada ka dhexaysa oo askarigii orod maagaaba waxa uu dhaadayaa in uu yahay garab ka maqan saaxiibbadii).

32- Hannaanka aad seeska uga dhigayso maamulka iyo maaraynta arrimaha colku waa in aad u dejiso heer geesinimo iyo raganimo oo ay tahay in uu nin waliba soo taabaa. (in aad higsigooda midayso oo dhiirrigeliso).

33- Hadba sida aad u la falgasho qaabdhismeedka iyo cimilada goobta aad ku dirirayso, ayaad uga kasbataa waxtar aan yarayn ama colkaagu ciiddaa iyo camaarkaa ha ahaado ama hurin yar'e.

34- Sidaa awgeed; jananka xariifka ahi waxa uu colkiisa u hoggaamiyaa sidii in uu hagayo hal nin, doon ama diid, sidaas ayaa lagaaga fadhiyaa.

35- Hawsha jananku waa in uu xasilloonaado si uu siraha colka u dhawro, waana in uu toosnaadaa oo caddaali ahaadaa si uu u joogteeyo hannaanka guud ee ciidanka.
36- Jananku waa in uu ka fajiciyaa sarkaalladiisa iyo askartiisaba isaga oo ku dagaya warbixin been-abuur ah iyo muuqaallo dhalanteed ah si ay u dhirfaan, qorshayaashiisana ay u mooggnaadaan. (ma aha in ay askartaadu ka war qabaan qorshayaashaada ee waa in ay kugu la bushaaraystaan guulahaaga, mar kasta oo shaxdaadu ay sir ahaataana waa mar kasta oo ay guushaadu geedkago'an noqoto).
37- Gedgeddiga qorshayaashiisa jananka xariifka ahi waxa uu ku marin habaabiyaa odoroska nacabkiisa iyo xogaha ay ka heleen oo ay ku kalsoonaan waayaan, toobiyaynta jidadkana waxa uu ku majare-habaabiyaa saadaashooda ah halka uu ku abbaaran yahay.
38- Kolka ay talo kalxamaha marayso jananka buuniga ahi waxa uu u dhaqmaa sidii ruux fananaya buur fiiqeed oo kolkii uu isku hubsaday sallaankii uu ku koray gadaal u harraatiyay si uu niyadda ciidankiisa uga tiro rajo dib-u-laabasho, waxa uuna colka xuluuliyaa xuduudka cadaawaha iyaga oo guul ama geeri ku xisaabtamaya.
39- Waxa uu gubaa laashashkiisa, waxa uuna burburiyaa dheryihiisa oo sidii ido-raac ayuu xayntiisii hadba jid

dahsoon qarda jeexsiiyaa[1], cidina ma ogaato dhanka uu ku abbaaran yahay iyo ujeedkiisa toona.

40- Ururinta iyo guulidda ciidanka iyo ku ganidda wanqartu waa hawsha jananka. (kolka aad intaas oo tallaabo soo qaaddo inta uu colku xamaasadaysan yahay ee aanu tebin in ay wax u dhinmeen waa in aad sida leebka laabta liddigaaga uga likaysaa).

41- Cabbirrada colaadeed ee kala geddisan ee ku kala habboon sagaalkii goobood ee aynnu soo carrabaabnay, waxa loo qiimaynayaa sida ay ugu habboon yihiin taatikada weerarka iyo difaaca, balse xeerarka aasaasiga ah ee qiimaynta dabciga Aadamaha iyo sida uu cabbirradaas iyo goobahaas u la falgalayaa runtii waxa ay u baahan yihiin in si ka-baaraandeg iyo lafagurid leh looga fiirsado.

42- Haddii aad xuluulato soohdinta cadaawaha xeerka ugu habbooni waa in aad ku fogaato oo gundhada u gasho dalka nacabka oo mar kasta oo aad ku sii durugtaa waa mar kasta oo is haysiga colkaagu uu adkaado, haddii se aad soohdinta jeenyaha uun la dhaafto oo adiga oo dalkaagii neecawdiisu ku hayso aad dagaallanto, faylfaylanka iyo filqanka geeshkaaga ayaad ka talisay.

43- Haddii aad soohdintaada ka baxayso oo dalka jaarka sii dhex'jibaaxayso is jir, waxa aad joogtaa goob wanqar ah

---

[1] Qardojeex: marka jidkii rasmiga ahaa laga leexdo ee meel aan jid ahayn oo tilmaansi lagu marayo la qaado. (Turjumaha)

ee sida ugu dhakhsaha badan uga agab ururso oo ka gudub, haddii se aad joogto meel afarta jihaba jidad ku leh waxa aad dultaxtaxaashinaysaa deegaan is goys ah oo arrimo badan kuu fududaynaya.

44- Haddii aad dal soohdintiisa ku fogaanayso isu badnaw, waxa aad ku sugan tahay goob wanqar ah. Haddii degaanka aad gashay xadkiisa aadan hore ugu taraarin waxa aad ku sugan tahay goob jimcoon.

45- Haddii aad joogto degaan, afaafkaaguna yahay marin cidhiidhyoon, gadaashaadana ay ka qotomaan qalcadihii cadawgu waxa aad joogtaa goob xayndaaban. Haddii aad joogto aag aadan gurmad iyo gargaar ka filanayn, waxa aad ku sugan tahay goob magangooyo ah.

46- Sidaa awgeed; kolka aad joogto goob faylfaylan waxa aad raggaaga tusisaa waddada lagu badbaadayaa in ay tahay midaynta higsigooda, kolka aad joogto goobta jimcoonna ku dedaal hubinta iyo joogtaynta xidhiidhka colkaaga.

47- Goobta kadeedka ah sayntaada dedeji si ay u gaadho goobta isla marka uu foolaadkaagu cagadhigto.

48- Goobta furan si digtooni iyo fiigganaan leh u ilaalee difaacaaga, goobta is goyska ahna xooji gaashaanbuurtaada.

49- Goobta wanqarta ah si joogto ah u dhaadhi (adkee) dhabbooyinka isu gurmadka geeshkaaga. Goobta kakanna

colkaaga ku guul in ay sida ugu dhakhsaha badan uga gudbaan jidadkeeda.

50- goobta xayndaaban awd (gufee) dalaw kasta oo uu colkaagu ka fakan karo si ay u midoobaan oo uga bannaystaan nacabka jid. Goobta maagangooyada ahna ku boorri in ay nafahooda uun badbaadsadaan. Jejebi dheryaha, awd ceelasha, niyaddoodana ku xidh in ay mintidnimo uun u dagaallamaan.

51- Taasi waxa ay ka dhabaynaysaa dabciga askariga ee ah in uu sida ugu adag uguna dagaalyahansan wax isaga caabbiyo kolka la go'doomiyo, in uu sidii dawri la saydhay u cargaagtamo marka uu tamar gabo, in uu amarrada si indho la'aan ah u qaato kolka uu wanqar dhexmuquuro.

52- Cidna ma gaashaanbuuraysan karno innaga oo aan ka gungaadhin hiyigooda iyo ujeedkooda. Ciidankeenna u ma abaabuli karno socod, umana gaardisiin karno degaan aynnu mooggan nahay kala sarrayntiisii: buurihiisa, kaymihiisa, wanqarihiisa, qawyadiisa, biyafadhiisinnadiisa iyo dhoobalaydiisa. Kama waxtaransan karno degaan aynaan u dhalan dabcigiisa cimilo iyo kiisa degaanba, haddii aynaan adeegsan dal yaqaanno u dhashay aaggaas. (qodobbadan waxa uu ku xusay cutubka 7^{aad} 12 - 14, waxa uuna u soo celiyay muhimad ay leeyihiin aawadeed).

53- Moogganaanta qodobadan soo aaddani kuma sama nin dagaal.

54- Nindirireedku kolka uu ku duulo dawlad xooggan, waxa uu u muujiyaa karaankiisa hoggaamineed hannaan uu kaga ilaalinayo nacabku in uu qiimeeyo xooggiisa, liddigiisana uu argagax laabta ugu ridayo, gaashaanbuurtoodana uu kaga fiijinayo in ay dagaal isaga lagaga soo horjeedo ka soo saftaan. (Xirfadda kala furfurista is haysadka safafka nacabku waxa ay kaaga fillaanaysaa wax rag badan kaa galaafan lahaa).

55- Nindirireedku uma halgamo hanashada gaashaanbuuraysiga dadyawga oo dhan, mana kobciyo awoodda dawlad kale ee waxa uu fushadaa qorshayaashiisa dadban, maanka liddigiisana cabsi ayuu ku ragaadiyaa, sidaas ayuuna ku burburin karaa boqortooyooyinka cadaawaha, kuna furan karaa magaalooyinkooda.

56- Abaali colkaaga adiga oo aan xeerar ku qaydayn (geesiga abaali, giiryaalahana[1] ciqaab) dir amarrada adiga oo aan hannaanadii hore u tixgalinayn (la jaanqaad hadba waxa aad ku sugan tahay) sidaas ayuun baad ku awoodaysaa in aad colkaaga oo dhan u maamusho sidii hal askari oo keliya.

57- Colkaaga amarka sii oo ha dhaadsiin qorshahaaga, kolka ay natiijo rooni ka soo baxdana ugu bushaaree oo

[1] Giiryaale: Fulayga haadkaroorka ah. (Turjumaha)

daaha uga qaad, hana dareensiin kolka ay arrini murugsan tahay in ay wax hallaysmeen.

58- Geeshkaaga goobaha ugu wanqarsan gondaha u gali isaga ayaa nabadqab kaga soo mudhaya'e, aagagga magangooyada ahna jeexsii isaga ayaa bedqab kaga gudbaya'e.

59- Waa hubaal kolka ay hurini halis ku hoobato in ay karaankooda soo bandhigayaan oo taag iyo tukurba isugu geynayaan badbaadada nafahooda, ka dibna guusha ayaa ay hantaan, dhibaabuhuna waa qodobka ugu mudan ee muujiya geesinimada ragga.

60- Goobta dagaalka guusha waxa aynnu u hananaynaa hadba sida aynnu hannaankeena u waafajino hammiga cadaawaha. (is habayici kolka uu weerarka hibanayo si uu u soo dhiirrado oo aad gunta uga jarto).

61- Isu jilcintaas iyo cadawgaas aynnu hadba dhanka ay inaga filanayaan iska tusaynaa waxa ay i noo saxar tiraysaa dhabbaha guusha, waxa ayna inagu simaysaa dilka taliyaha.

62- Taas ayaa loo yaqaanaa hannaanka u dhammaystirka hawl sida ugu suubban uguna xeeladda badan.

63- Maalinka aad maamulka hanato (dilka taliyaha cadaawaha ka dib) jidadka xuduudka ku yaalla oo dhan xannib, goobaha socdaalkana dumi (Gagida iyo dekedda waqtigeenan) dhammaan ergooyinka iyo rakaabka ku socda ama ka socda dalka nacabkana haki.

64- Ku adadkaw (ka taliye ahaan) go'aannada aad ka dhiibanayso golaha tashiga iyo maamulka dalkaaga. Sidaas ayaad ku hananaysaa xakamaha falalkaaga iyo hawlgalladaada'e.

65- Haddii uu liddigaagu ka tegay irrid furan waa in aad u guclaysaa galitaankeeda. (haddii uu dhaawac ka tegay waa in aad dhaydaa si aad laabaha u mulkido).

66- Si aad u minjaxaabiso qorshaha cadawga ka hano wax agtiisa qaali ku ah, ka dibna ku dag oo ku gumayso adiga oo go'aaminaya goobta aad isku haleelaysaan.

67- Raac xeerka iyo qorshaha ay kaaga baahan tahay goobtaasi oo ha tixgalin dhaqammadii soojireenka ahaa, shaxdaadana waafaji higsiga cadaawaha si aad u la gaasho dagaal ama geeri aakhiro ama guusha nololeed ah.

68- Ugu horraynta u muuji khajilaadda gashaantida si uu nacabku u faxaaxsado oo feejignaanta badan u dhimo, ka dibna sidii faras la jeedaliyay ugu haad, kama gaadhsiinayo habaynta safafkiisa iyo dib u abaabulka difaaciisa'e, kolkaasaad shafka ku qaadnaysaa.

Cutubka12[aad]: Dab ku-weerarka

1- Waxa jira shan hab oo dabka loogu weerartamo:
1) In aad ku holciso colka cadawga saldhigyadiisa.
2) In aad gubto kaydadkiisa quudka iyo qalabka dagaalka.
3) In aad gubto gaadiidkiisa iyo jidadka gurmadkiisa.
4) In aad gubto hubkiisa iyo saanaddiisa.
5) In aad leebab holcaya ku halgaaddo safafkiisa.

2- Si aynnu u weerar gallo, waa in aynnu si dhammaystiran u abaabullaanaa, agabkii gubidda iyo ganidda dabkuna ay i noo diyaarsanaadaan.

3- Waxa jira xilliyo ku habboon dab ku weerarka iyo waliba maalmo sheeggan oo dabka sida ugu wanaagsan loogu weerartamo.

4- Xilliga ugu habbooni waa marka ay cimiladu engegan tahay, maalmaha sheegganina waa kolka uu dayaxu yahay bisha (ilaa habeenka 7[aad]), shan iyo tobnaadka iyo habeennada ay bishu ribbato[1] (29 - 30 bisha dayaxa) maalmahaasna waxa soo dhacda laydh firfircoon.

5- Kolka aad dabka ku weerartamayso waa in aad shan arrin oo muhim ah u aabaabullaataa:

---

[1] Ribbad: Marka ay bishu aadka u yaraato ee subaxnimadka soo bixitaankeeda la waayo. (Turjumaha)

6- (1) kolka uu holacu ku hoobto saldhigga cadawga waa in aad duullaan degdeg ah galaabixisaa oo qacdiiba weerartaa.
7- (2) haddii uu dabku saldhigga nacabka qabsado, balse ay colkiisu degganaadaan oo diyaarsanaadaan waa in aadan weerarin inta aad ka helayso fursad ku habboon. (ujeedka dabka ee ugu mudani waa isku buuqa iyo burburka safafka cadaawaha, haddiise uu degganaado waa in aad dhan kale uga wareegtaa).
8- (3) kolka uu dabku goonyaha isaga baxo ee uu cadawga jilciyo haddii ay suuragal tahay weerar ku halgaad, haddiise aanay suure ahayn ka gaagaabso.
9- (4) Haddii aad fursad u hesho in aad saldhigga nacabka dusha kaga daadiso dab, ha sugin inta uu holcayo ee shuf beelayo, laga yaabaa waxa sidaas ah oo ka gubtaaba in aanay oollin oo uu waqti badani kaa lumo'e.
10- (5) haddii aad nacabkaaga dab ku weerarayso dabayldhaca[1] ka mar oo dabaylwaca[2] ha ka xigin.
11- Dabaysha maalintii in badan ayay dhacdaa oo socotaa, balse neecawda habeenkii markiiba way dhammaataa.

---

[1] Dabayl dhac: Dhanka ay dabayshu ka timaaddo, sida ay xagaagii koonfur uga timaaddo. (Turjumaha)

[2] Dabayl wac: Dhanka ay dabayshu u socoto, waliba marka ay dhismaha ama dhufayska ciidanku ku jiro dabayshu inta ay sidii wax dhaafaya noqoto ay haddana dib ugu soo weecato ee habaaska ugu liqdo. (Turjumaha)

12- Ciidan kastaa waa in uu ka dheregsanaadaa shantaas hannaan ee dabka loogu weerartamo, waana in uu yaqaanaa guurguurka iyo xisaabinta xiddigaha. Sidoo kalena; waa in uu yaqaanaa is gedgeddiga waayaha si uu u la socdo xilliga soo dhicista dabaysha iwm.

13- Colka u adeegsada dabka fududaynta weerarkoodu waxa ay adeegsadeen xeelad maskaxaysan, balse colka u adeegsada biyaha dhibrinta weerarkoodu waxa ay hananayaan awood dheeri ah.

14- Kolka biyaha la adeegsado cadowga jidgooyo ayuun baa loo dhigan karayaa, balse hayntiisa lama boobi karo. (biyuhu way ka saamayn yar yihiin dabka, balse way kaga mashquulin badan yihiin cadawga).

15- Wuu nasiib xun yahay ninka isku daya in uu dagaalka libin ka gaadho weerarkana ku guulaysto isaga oo aan colkiisa ku beerin nafsad is biimayn ahi, waxa uuna ka dhaxlaa waqti lumin iyo col hodid.

16- Hoggaamiyaha aqoonta lihi waxa uu shaxdiisa dejistaa goor hore, jananka guusha hantaana waxa uu ilaaleeyaa hannaanka iyo habsami'usocodka gulufkiisa. (isaga oo ku ilaalaynayaa abaalinta, ciqaabista iyo qumminta wixii qalloocsama.

17- Ha dhaqaajinnin ciidanka adiga oo fursad ku habboon u hela mooyaane. Ha dagaal galin colka iyada oo ay meeshaas faa'iido ka soo naasacaddahay mooyaane.

Hana dagaallamin mar haddii aanu go'aankaagu geedkago'an ahayn.

18- Ma aha talisku in uu colkiisa ku dagaal galiyo cadhadiisa, mana aha in uu ku dagaal galiyo sharaftiisa oo meel lagaga dhacay.

19- Dagaalka haddii ay dani kuugu jirto hore ugu soco, aanay ahayn ka hako.

20- Dhirifka haddii ay muddo ka soo wareegto badhaadhe ayuu isu beddelaa, waxyaabaha kaa xanaajiyaana laga yaabaa in ay isu beddelaan wax aad ku il doogsato.

21- Haddii la burburiyo boqortooyo way adag tahay sida ay dib cageheeda isugu taagtaa, naf go'dayna haddii ay galbato gadaal uma soo laabato, laf jabtayna sideedii ma noqoto.

22- Haddaba; hoggaamiyaha aqoonta lihi wuu feejignaadaa, jananka doorka ahina wuu digtoonaadaa, habkaas oo keliya ayaa waddankana burbur iyo colaad lagaga baajin karaa gudo iyo dibedba, xoogga dalkuna ay ku fayo qabayaan kuna diyaarsanaanayaan.

Cutubka 13^{aad}: Adeegsiga Sirdoonka

1- Ururinta iyo kulminta boqol kun oo askari, carbintooda iyo gaardisiintooda masaafo dheeri waxa ay saboolinaysaa shacabka, ilaha dhaqaale ee dawladdana way uusmiiranaysaa oo qarashka maalinlaha ah ee ku baxaya colkaasi waxa uu gaadhayaa kumannaan googo' iyo giniyo lacageed ah, nacaybka iyo naxliguna meel walba wuu ku baahayaa, geeshkuna waxa ay ku dhacsaalayaan socodka dheer ee ay galayaan, boqollaal kun oo qoysna nololmaalmeedkoodii iyo shaqadoodii ayay jallaafo ku noqonayaan.

2- Collaalka loollamayaa guyaal ayay is horfadhiyaan, colaado lagu hoobtaana way dhexmaraan, mid walibana waxa uu u halgamayaa hanashada libinta, guushaasina maalin ayuun bay dhaboobaysaa, balse in aad moogganaato duruufaha ku gedaaman cadaawaha adiga oo is diidsiinaya bixinta xoogaa qarash ah oo aad ku gadato xumatashiilka iyo basaasiinta nacabaagu waa sacsacnimo halkii ugu sarraysay.

3- Taliyaha sidan u dhaqmaa u ma qalmo in uu gadhwado colka, boqorkiisana gacan hagar la'aaneed u ma fidiyo, libinna ma soo hooyo.

4- Haddaba, tiirka ka taageera boqorka tisqaadka ah iyo taliyaha taatikada ku talaxtagay in ay taallooyinka ka tallaabaan, tamartoodana libin ku soo taabaani waa u-dhuundaloolaanta qorshayaasha cadawga, adiga oo xogihiisa ururSanaya, waana qodobka ay mogganaayeen hoggaamiyayaashii hore.

5- Hanashada xogta nacabka kolka ay dejiyaanba lagu ma ogaado ruuxda oo loo baaqo ama [Ilaahayada] oo la gargaarsado ama waayo aragnimo xeeldheer oo lagu daraaseeyo amaba xisaabinta falagga iyo xiddigiska.

6- Dhaqdhaqaaqa iyo ujeedooyinka dhabta ah ee nacabka waxa keliya ee lagu ogaan karaa waa rag kale oo kuu ibo lisa uun.

7- Taasina waxa ay keensanaysaa in sirdoon la dirasado. Basaasyadana waxa loo abla'ableeyaa shan qaybood:

1) Basaasiin madani ah.
2) Basaasiin gudaha ah.
3) Basaasiin dhalan rogan.
4) Basaasiin hallaysan.
5) Basaasiin badbaadsan.

8- Kolka ay shantaa waaxood ee basaasiintuba hawlgalaan cidina ma faydi karto isku xidhnaantoodaa dahsoon, waana sirdoonka ugu mudan ee gacan qabta boqorka.

9- Adeegsiga basaasiin madani ahi waxa ay tibaaxaysaa soo dhowaysiga iyo hanashada laabaha oosha (beesha) deggan kabaabiga (aagga) nacabka. (haddii ay adiga kaa jeclaystaan

cadawga iyaga ayaa iskood kuu la soo socodsiinaya dhaqdhaqaaqa iyo xogaha ay ka helaan nacabka).

10- Adeegsiga basaasiin gudaha ahi waxa ay qeexaysaa in aad dirsato sarkaallada cadawga qaarkood. (waa muhim in aad u dhuundaloosho duruufaha colka cadaawaha oo aad kala ogaato cadaqaatahooda, kooda la ciilay iyo giiryaalohooda si ay kuugu sahlanaato hanashada laabahoodu).

11- Adeegsiga basaasiin dhalan rogani waxa ay faallaynaysaa in aad hanato sirdoonka nacabka laftiisa. (adiga oo ama u muujinaya dhaqdhaqaaq aad ku marinhabaabinayso si ay xogo qaldan u gudbiyaan ama iyaga laftooda la xidhiidhaya oo galinsiinaya in ay xogo silloon cadawga u gudbiyaan).

12- Adeegsiga basaasiin hallaysani waxa ay lafa guraysaa in aad maalincaddeey dirto sirdoon si ay u sameeyaan hawlo marinhabaabiya basaasiinta nacabka, ka dibna inta la qabto marka la caddibo ay qirtaan oo sheegaan xogihii silloonaa, ka dibna la qudh gooyo.

13- Adeegsiga basaasiin badbaadsani waxa ay faallaynaysaa in aad dirsato sirdoon hulluuqsada saldhigga nacabka oo inta ay xogaha ka soo uruuriyaan dib uga soo laabta ama kuwo gudaha saldhigga ku jira ka soo halabsada warbixinnada.

14- Ma jiraan arrimaha ciidannimo wax ka mudan dhawrista xidhiidhka san ee suubban ee la la yeesho

sirdoonka, mana jiraan wax ka saami badan dhanka dhaqaalaha oo waa in si hagar la'aan ah loogu deeqaa basaasiinta, waana in xidhiidh hoosaadka uu suldaanku la leeyahay sirdoonku uu taabbaqaad yahay oo suldaanka iyo sirdoonka aanay cidi u dhexayn ee ay goob kasta iyo goor kasta oo ay u baahdaan boqorka heli karaan.

15- Sirdoonka lama hawlgalin karo iyaga oo aan la siin xeerar cayiman oo la fahmi karo.

16- Basaasiinta lama maamuli karo haddii aan lagu la dhaqmin naxariis badni iyo dhabkahadalnimo. (ma jiro hab loo la dhaqmo basaas oo ka wanaagsan kasbashada kalsoonidiisa).

17- Haddii aanu suldaanku lahayn rugcaddaanimo xeeladeed iyo garaad faallada iyo falanqaynta ku san, kuma kalsoonaan karo xogaha ay soo gudbinayaan sirdoonku.

18- Xeel dheerow! Xeel dheerow! Sirdoonkana u adeegsado arrin kasta iyo ujeeddo kastaba.

19- Hadii uu basaas soo guuriyo xogo aan xilligoodii la gaadhin oo been'abuur ah waa in aad dishaa basaaskaas iyo cid kasta oo u soo gudbisay xogtaasba. (dilka basaasku waa ciqaab, dilka cidda u soo guurisayna waa tusaalayn).

20- Haddii uu hiyigaagu yahay muquuninta ciidan, duminta magaalo ama shirqoolidda ruux, ugu horrayn waa in aad bawsataa magacyada kaaliyayaasha, shaqaalaha iyo ilaalada, waana in aad sirdoonka u dirtaa soo xaqiijinta

magacyadaas, waa in aad ku dedaashaa kuwayawgaas mid ka mid ah in aad soo liicsato adiga oo laaluushaya.
21- Waa in aad baadigoobtaa sirdoonka uu liddigaagu u soo dirsaday basaasiddaada oo inta aad laaluush ku horto aad dejisaa goobo nafta u roon, ka dibna aad dhalan doorisaa oo dhankaaga ka dhigtaa, si ay adiga kuugu adeegaan oo kuu hoosyimaaddaan.
22- Xogaha aynnu ka helayno basaasiintaa dhalan rogani waxa ay i noo dhibrinayaan hanashada iyo hawlgalinta basaasiin madani ah iyo basaasiin gudaha ah.
23- Isla xogahaas aynnu ka helayno basaasiinta dhalan rogmay ayaynnu ku awoodaynaa in aynnu basaasiinta hallaysan ku rarno hirar ah xogo been'abuur ah si ay nacabka u marinhabaabiyaan.
24- Ugu danbaynna, innaga oo ka duulayna xogahaas ay dhammaan noocyada basaasiintu i noo soo gudbiyeen waxa aynnu awoodaynaa in aynnu u dirsano basaasiinta badbaadsan hawlgallo xaddidan.
25- Higsiga iyo ujeedka sirdoonka iyo adeegsiga shantan kooxood ee basaasiinta ahi waa ogaanshaha abbaarta nacabka, bawsigaasna waxa looga shidaal qaadanayaa basaasiinta dhalan rogan. Sidaa awgeed; waa in

basaasiintaas si deeqsinimo iyo gacan furnaan ah mood[1] iyo noolba[2] loogu hurgufaa oo loo (haqab) baahi tiraa.

26- Taasna waxa marag u ah sooyaalka oo i noo tusaalaynaya: in ay qoyskii reer-Yin ku hanteen madaxnimada I Chih dartii oo u adeegi jiray Hsia, qoyska Chou ay boqortooyada ku hanteen Lu Ya dartii oo u adeegi jiray Yin.

27- Sidaa awgeed; hoggaamiyaha indheergaradka ah iyo jananka xirfadyahanka ah ayuun baa awooda u qaramaynta basaasnimada ruuxba ruuxa uu ka garaadka iyo karaanka badan yahay oo guulo lagu reeyo soo gelbin kara. Hawlgalka sirdoonkuna waa tiirarka ugu muhimsan xilliga colaadda ee uu ciidanku dhaqdhaqaaqiisa, duullaankiisa iyo difaaciisaba uga shidaalqaadanayo.

---

[1] Mood: Hantida ma noolaha ah, sida lacagta iyo dahabka. (Turjumaha)

[2] Nool: Hantida noolaha ah sida mayeedhaanka. (Turjumaha)

Gunaanad

Waxa aynnu ka dheehanaynaa xogaha uu soo tebinayo dhiganahan "loollan" in uu u qalmo in uu ka mid noqdo 100^{ka} dhigane ee sooyaalka Aadamah ugu mudan. Waxa uu caan ka yahay dadka hoggaamiyayaasha ah ama ciidan ha ahaadeen ama kuwo istiraatiijiyad kale hagaya sida shirkadaha'e agtooda.

Ka dib markii aad ka bogatay xeerarka uu dhiganahani muujinayo, waxa aad awooddaa in aad hagto oo hoggaamiye u noqoto ciidan, shirkad, goob shaqaale, goob waxbarasho iwm. Waxa aad kala garanaysaa xeerarka aad ku noqonayso hoggaamiyaha dhammayska tiran ee is huba, waxa hankaagaas liidaya iyo higsigaaga sida aad uga dhabayn kartidba, waana adiga iyo garaadkaa sida aad u adeegsataa.